

DEGMADA SAN DIEGO

DIIWAAN-HAYAHA

COD-BIXIYAYAASHA



2023 – 2027
QORSHAHA MAAMULKA DOORASHADA
CUSBOONAYSIINTA WAX LAGA BEDDELAY



SHAXDA TUSMADA

Soo koobid Fulineed.....	8
Warqada Lagu codeeyo Boostada	10
Gundhig.....	10
Daabacaadda Warqada Codbixinta iyo Diyaarinta Boosta ku soo dirista.....	11
Ka shaqaybta Waraaqaha Cod bixinta ee lagu soo celiyay Boostada	11
Tirinta Waraaqaha Codbixinta ee Lagu soo celiyay Boostada.....	11
Dabagalka Warqadaha Codbixinta ee Boostada	12
Xarunta Codbixinta iyo Goobaha leh Sanduuqa Lagu Rido Warqada Codbixinta.....	13
Qaacidada iyo Tixgelinada Xarunta Cod bixinta.....	13
Shuruudaha Ugu Yar ee laga rabo Xarunta Codaynta	14
Doorashada Goobta Xarunta Codbixinta	14
Qiimaynta Sahan-dhuleedka Xarunta Codbixinta	14
Hannaankii Dadka Ka Shaqaalaysiinta Xarunta Codbixinta.....	14
Cilmi-baarista Xarunta	15
Liiska Xarumaha Codaynta Suurtogalka ah ee leh Maalmo iyo Saacado La shaqeeyo	15
Khariidadda Goobaha lagu soo jeediyay inay noqdeen Xarumaha Codbixinta.....	16
Qaabka Loo qaabeeyay Xarunta Codbixinta	17
Tirada Shaqaalaha ka shaqeeya Xarunta Codbixinta.....	18
Tababarida Shaqaalaha ka shaqeeya Xarunta Codbixinta.....	18
Qaacidada iyo Tixgelinada Goobta la dhigayo Sanduuqa Lagu rido Codbixinta	19
Shuruudaha Ugu Yar ee laga rabo Sanduuqa Lagu rido Warqadaha Codbixinta	19

Qiimaynta Sahan-dhuleedka Sanduuqa Lagu rido Warqadaha Codbixinta	20
Hannaankii Dadka Ka Shaqaalaysiinta Goobta leh Sanduuqa Lagu rido Warqada Codbixinta	20
Liiska Sanduuqyada Lagu rido warqada Codbixinta Suurtogalka ah lehna Maalmo iyo Saacado La shaqeeyo	21
Khariidadda Goobaha La Soo Jeediyay in laga dhigo Goobaha Sanduuqa Lagu Rido Warqada Codbixinta.....	22
Khariidadda Goobaha uu yaalo Sanduuqa Lagu rido Warqada Cod-bixinta Waqti xaadirkan	23
Xarumaha Codaynta iyo Qalabka Lagu Dhiso Goobaha La geynayo Sanduuqa Lagu Rido warqada Codbixinta iyo Nidaamka La adeegsaday.....	24
Nidaamyada la raacayo	24
Foomka Talo-bixinta Xulashada Goobta ee ku jirta Websaydka.....	24
Adeegyada Codbixiyayaasha Naafada ah	25
Sahanka Si fudud u isticmaalida goobta ee La cusboonaysiiyay.....	25
Macluumaadka Adeegyada La siiyo Codbixiyayaasha Naafada ah oo lagu daray Buug-yaraha Macluumaadka Codbixiyaha iyo Tilmaamaha VBM.....	26
Macluumaadka La heli karo ayaa La soo Dhigay Websaydka.....	26
Sida Codbixiyaha Naafada ahi uu u codsan karo Warqadda Codbixinta Boostada, RAVBM, ama Warqadda Bedelka.....	26
Si fogaan arag ah ugu Codeynta adigoo isticmaalaya Boostada (RAVBM)	27
Nooca iyo Tirada Aaladaha calaamadaynta warqada cod bixinta ee La heli karo...	27
Nooca iyo Tirada wax ka beddelka Macquulka ah ee Lagu sameeyo Xarumaha Codbixinta	27
Codbixinta Guurguura.....	28
Khadka Taleefanka Codbixiyaha ee Bilaashka ah	28
Shirarka Fiidiyowga	29
Kaalmada Luuqaddeed	30

Warqadaha Tixraaca Codbixinta La turjumay iyo Kaalmada Luuqadeed	30
Adeegyada Kaalmada Luqadeed ee ku jira Buug-yaraha Macluumaadka Cod-bixiyaha ama Tilmaamaha Cod-bixinta Boostada iyo Websaydka	30
Shaqaalaha Xarunta Codbixinta Laba-luqadlaha ah iyo Luuqadaha la taageero....	31
Khadka Taleefanka Codbixiyaha ee Bilaashka ah iyo Xarunta Wicista Codbixiyaha.....	31
Tignoolajiyada Lagu Codeeyo.....	32
Nidaamka Codeynta	32
Aalada Lagu calaamadeeyo Warqada Codbixinta (BMD).....	33
Ammaanka Codbixinta	34
Qorshayaasha Amniga iyo kuwa Kadiska ah ee lagu Xaqiijinayo Ka Hortagga Carqaladaynta	34
Iskaashiga Gobolka, Federaalka, iyo kuwa Deegaanka ah	34
Kontoroolada Gudaha.....	34
Habraciyada, Hababka iyo Heerarka.....	35
Qorshayaasha Amniga iyo kuwa Kadiska ah ee lagu Xaqiijinayo Sii Socodka Doorashada Haddii ay dhacdo Carqalad	35
Jawaabta Xarunta Codbixinta Inta lagu jiro Muddada Cod bixinta.....	35
Qorshaha Sii wadida Hawlaha.....	36
Hababka iyo Heerarka	36
Hawlaha Muhiimka ah.....	36
Xiriirada.....	36
Xarumaha Kale	37
Saamaynta Maaliyadda.....	38
Qiyaasta Kaydinta Muddada-gaaban iyo tan Muddada-dheer.....	38
Dulmarka Qorshaha Waxbarashada Cod-bixiyayaasha iyo Wacyigelinta	40
Gundhig.....	40

Soo-koobidda Yoolalka	42
Shuraakada Bulshada.....	42
Voter Accessibility Advisory Committee iyo Language Accessibility Advisory Committees	43
Aqoon-is-weydaarsiyada Waxbarashada Cod-bixiyaha ee Bulshooyinka Luqada.....	43
Hababka Lagu Aqoonsado Bulshooyinka Luuqada	44
Khadka Taleefanka Codbixiyaha ee Bilaashka ah iyo Kaalmada Luuqaddeed	44
Aqoon-is-weydaarsiga Waxbarashada Cod-bixiyaha ee Bulshada Naafada ah	45
Wacyigelinta Si fogaan arag ah ugu Codeynta adigoo isticmaalaya Boostada	45
Dugsiyada Sare.....	45
Kulliyadaha iyo Jaamacadaha	46
Xarumaha Xabsiga, Xilliga kormeerka danbiilaha, iyo Dadka lag soo dhaayay xabsiga	46
Ka Qaybgalka Codbixiyayaasha iyo Dhacdooyinka Bulshada.....	46
Dhacdooyin Bulsho	47
Qorshaha Warbaahinta Guud.....	48
Wada-hawlgalayaasha warbaahinta	48
Shuraakada Warbaahinta Luuqadda	48
Xiriirada Tooska ah ee Cod-bixiyayaasha.....	49
Kaadhka Boostada Lacagteed horey loo bixiyay ee lagu Codsado Walxaha ku qoran Luuqad kale ama qaab si fudud loo heli karo.....	49
Ogeysiisyada Adeegga Dadweynaha	49
Baraha bulshada.....	50
Boodhadhka banaanka, Hooyada gaadiidka iyo boodhadhka waaweyn ee xayaysiinada.....	50

Websayd.....	51
Miisaaniyadda La saadaaliyay ee Wacyigelinta Cod-bixiyayaasha	52
Lifaaqyada.....	53
Kulamada Dadweyne.....	53
Jadwalka Kulan Dadweyne.....	54
Dhacdooyin Bulsho	55
Shuraakada Bulshada.....	71
Shuraakada Bulshada ee Bixisa Adeegyada Luuqadda	71
Tusaalaha Kaadhka Kaalmada Luqadda	73
Shuraada Bulshada ee Dadka Naafada ah.....	74
Siyaasadda, U Qareemida, iyo/ama Ururada Xirfadleyda.....	75
Wada-hawlgalayaasha warbaahinta.....	76
Shuraakada Warbaahinta Luuqadda	78
Tusaalaha Goobaha Lagu dhajiyo Boodhadhka Waxbarasho ee Cod-bixiyaha Dibadda.....	79
Dulmarka Ra'yiga Dadweynaha.....	86
Voter Accessibility Advisory Committee (VAAC).....	86
Ajendaha Kulanka VAAC (Tusaale).....	87
Language Accessibility Advisory Committees (LAAC).....	88
Ajendaha Kulanka LAAC (Tusaale).....	90
Qaabka Loo qaabeeyay Xarunta Codbixinta (Tusaale)	91
Xarunada Codbixinta iyo Goobaha leh Sanduuqa Lagu Rido Warqada Codbixinta	92
Khariidadaha Shuruudaha Xeerka Doorashada Cod-bixiyaha	112
Jidadka Gaadiidka Dadweynaha	112
Aagagga leh Isticmaalka Codbixinta Boostada ee Hooseysa	113
Cufnaanta Dadweynaha	114

Aqoonta Ingiriisiga Xaddidan	115
Codbixiyayaasha Naafada ah	116
Heerarka Hooseeya ee Lahaanshaha Baabuurta.....	117
Aagagga Bulshooyinka Dakhligoodu Yar yahay	118
Deganeyaasha U Qalma Ee Aan Weli Isku diiwaangelinin Inay Codeeyaan.....	119
Dadweynaha Juqraafi ahaan Go'doonsan	120
Goobaha suurtoogalka ah in laga dhigo Xarun Codbixin ama Sanduuqa lagu rido Warqada codbixinta	121
Xeerka Doorashada Cod-bixiyaha – Buug-yare	122
Sheekada Xarunta Wararka Degmada.....	124
Daabacaado.....	125
Ogeysiinta Dadweynaha ee Xilliga Faalloyinka Qorshaha Maamulka Doorashada ee 2023.....	125
Ogeysiiska Dadweynaha ee Dhageysiga Dadweynaha ee 2023.....	126
Ogeysiinta Dadweynaha ee Xilliga Faalloyinka Qorshaha Maamulka Doorashada ee 2022.....	127
Ogeysiiska Dadweynaha ee Dhageysiga Dadweynaha ee 2022.....	128
Ogeysiiska Dadweynaha ee Dhageysiga Dadweynaha Labaad ee 2022.....	129
Toos ugu dirida Boostada (Tusaale).....	130
Habmaamuska COVID-19	133
Hawlaha la Mamnuucay.....	134
Tusaalaha Warqadaha iyo Qoraalada La dhigo Baraha Bulshada	135
Qodobbada Doorashada Gaarka ah	136

Soo koobid Fulineed

Xeerka Doorashada Cod-bixiyayaasha California (VCA), ama Senate Bill (SB) 450 (Allen, D-26) waxaa si sharci ahaan ah la saxiixay Sebtembar 29, 2016, isagoo ku daray Qaybta 4005 ee Xeerka Doorashooyinka California, oo u oggolaanaya gobollada la oggol yahay, markay oggolaadaan Guddigooda Kormeerayaasha, si ay doorasho kasta ugu qabtaan boostada, iyadoona leh shuruudo gaar ah. Marka loo eego VCA, dhammaan cod-bixiyayaasha waxa loogu diraa boostada warqad codbixineed oo bilaabanaysa 29 maalmood ka hor doorashada, degmo kastana waxay samaysaa, iyada oo la kaashanaysa fikradda dadweynaha, goobo badan oo leh sanduuq lagu rido warqada cod bixinta iyo xarumo codbixin oo laga hirgeliyo gobolka oo dhan halkaas oo cod-bixiye kasta oo degmadu uu ka dhiiban karo codkiisa. Sharcigani waa mid ka mid ah dib-u-habayno badan oo doorasho oo loogu talagalay in lagu beddelo sida doorashooyinka loo qabto si loo kordhiyo ka-qaybgalka cod-bixiyaha iyo waajibaadka cod-bixiyaha iyada oo la kordhinayo qaababka kala duwan ee loo sameeyo cod-bixinta.

Golaha Kormeerayaasha Degmada San Diego ayaa ansixiyay inay degmada u wareegto qaabka xarunta codbixinta sida ku cad Xeerka Doorashada Cod-bixiyayaasha [Oktoobar 19, 2021 \(sheeko wareed\)](#). San Diego County Registrar of Voters (Diiwaan-hayaha Cod-bixiyayaasha Degmada San Diego) isla markiiba waxa uu sameeyaa kooxo ka shaqeeyo gudaha ah si ay u horumariyaan habraacyada hawl-gelinta iyo qabashada doorashooyinka iyada oo la raacayo moodheelka lagu codeynayo xarunta.

Qorshayn muhiim ah oo ay weheliso iibsashada tignoolajiyada iyo qalabkii loo baahnaa ayaa mar horeba la dhammaystiray taas oo ka dhalatay maamulida Nofeembar 3, 2020, Doorashada Guud ee Madaxweynaha iyo Sebteembar 14, 2021, Dib-ugu-celinta Doorashadii Barasaabka California sida ku cad moodheelka "VCA-like" iyadoo ayna sabab u ahayd cudurkii safmarka caalamiga ahaa.

Marka laga soo tago shaqada uu horay u qabtay xafiiska Diiwaan-hayaha, waxaanu ku darnay jawaab celin ay bixiyeen cod-bixiyayaasha iyo guddiyada la-talinta bulshada sida Language Accessibility Advisory Committee (LAAC), iyo Voter Accessibility Advisory Committee (VAAC). Waxaan sidoo kale uga mahadcelineynaa taageerada iyo tilmaanta ay na siiyeen xafiiska Xoghayaha Dawladda iyo gobollada kuwaas oo guurimaad sameeyay anaga horteen.

Waxaad wax badan oo ku saabsan ku biirista LAAC iyo VAAC ee degmada ka ogaan kartaa websaydka Diiwaan-hayaha ee barta [Language Accessibility Advisory Committee \(sdvote.com\)](#) iyo [Voter Accessibility Advisory Committee \(sdvote.com\)](#).

Qorshaha Maamulka Doorashada (EAP) waxa uu bixiyaa aasaaska iyo hagida habraaca mustaqbalka ee codbixinta iyo doorashooyinka Degmada San Diego. Waanu cusboonaysiinay websaydkeena waxaana aanu samaynay buug-warbixineed si aanu dadweynaha ugu wargelinno Xeerka Doorashada Cod-bixiyaha. Websaydka waxaa laga heli karaa [Xeerka Doorashada Codbixiyayaasha \(sdvote.com\)](#) muunad buug-yaraha ah waxaa laga heli karaa bogga 122.

Dhamaystirka EAP kadib, xafiiska diiwaan-hayaha waxa uu hirgaliyay qorshe dhamaystiran oo wax lagu barayo codbixiyayaasha iyo wacyigalinta kaas oo balaariyay joogitaankeena baraha

bulshada, iyo sidoo kale iskaashiga aan la leenahay dugsiyada sare iyo machadyada tacliinta sare, iskaashiga hay'adaha dawlada iyo ururada bulshada. Intaa waxaa dheer, waxaan ku darnay aqoon-is-weydaarsiyo kala duwan oo wax lagu barayo cod-bixiyayaasha jadwal doorasho kasta. Qorshahani waxa uu siiyay qaab-dhismeedka xafiiska Diiwaan-hayaha si uu u gaadho yoolkiisa ah in uu ku wargeliyo Degmada San Diego in ka badan 1.9 milyan oo cod-bixiyeyaal ah oo ka diiwaan gashan inay degmadu u guurayso moodheelka laga xodeeyo xarunta.

2023-2027 EAP waa la cusboonaysiiyay si ay u muujiso hawlaha doorashada ka dib markii la qabtay qaar ka mid ah doorashooyinka gobolka iyo deegaanka iyadoo la raacayo moodheelka laga codeeyo xarunta waxayna ku daraysaa jawaab celin dheeri ah oo laga helay dadweynaha.

Waqtiga cusboonaysiinta EAP-gan, Degmada San Diego waxay lahaan doontaa ugu yaraan 193 xarumo codbixineed, dhammaantood waxay furnaan doonaan afar maalmood, oo ay ku jirto maalinta doorashada, iyadoo 39 ka mid ah 193-ka xarumood ee codbixinta ay furnaan doonaan toddoba maalmood oo dheeraad ah wadar ahaan 11 maalmood iyo ugu yaraan 129 goobood uuna yaalo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta ee boostada lagu soo diro ayaa furan muddo bil ku dhow. Codbixiyayaashu waxay ku soo celin karaan warqadooda cod-bixinta boostada (lacag ku bixin boostada looma baahna), goobta sanduuqa lagu rido warqada codbixinta, ama xarun kasta oo codbixineed.

Shaqaalahaheya iyo aniga waxaa wali naga go'an hadafkeena ah inaan ku siino adeegyada doorashada muwaadiniinta Degmada San Diego iyadoona leh heerka ugu sarreeya ee doorashada xirfadeed heer sare ah, oo ay ku jiraan la xisaabtanka, amniga, iyo cadaaladnimada, anagoo hubinayna in si siman loo helo geedi socodka codbixinta, ilaalinta sharafta codadka, iyo ilaalinta habraac hufan, sax ah oona cadaalad ku dheehantahay.

Cynthia Paes
Diiwaan-hayaha Cod-bixiyayaasha
Degmada San Diego

Warqada Lagu codeeyo Boostada

§4005(a)(8)(A)

Dhaqangelinta Xeerka Doorashada Codbixiyaha (VCA) ee Degmada San Diego waxay u baahan tahay in mid kasta oo ka mid ah codbixiyeyaasheeda firfircooni ee ka badan 1.9 milyan oo ay ku helaan warqadda codbixinta boostada. Degmada San Diego waxa ay cadaysay in ay ka adagtahay in ay xakamayso mugga daabacaadda, dirida, iyo ka shaqaynta waraaqaha lagaga codeeya boostada ee ka dhasha waajibaadkan. Shuruuddani waxay taageertaa hab-dhaqanka codbixiyaha waqti xaadirkan iyo isbeddellada la saadaaliyay, kaas oo Diiwaan-hayaha Xafiiska Codbixiyaha ee Degmada San Diego uu hore u tixgeliyey.

Intaa waxaa dheer, dhammaan doorashooyinka mustaqbalka, dhammaan codbixiyayaashu waxay hadda ku heli doonaan warqadda codbixinta boostada iyada oo aan loo eegin dookha qofka ama qaabka codaynta, iyada oo la raacayo sharciga Golaha 37 (Berman).

Gundhig

Doorashadii hordhaca ahayd ee madaxweynaha bishii Maarso 2020, xafiiska diiwan-hayaha ayaa ku dhawaad 1.4 milyan oo warqadaha codbixinta boostada u soo saaray dadka ku codeeya boostada kuwaas oo si gaar ah u codsaday inay warqadahooda codbixinta ku helaan boostada, ku dhawaad 75% wadarta codbixiyayaasha gobolka ee diiwaangashan. Tirada codbixiyayaasha ee codsada inay ku helaan warqadaha cod bixinta boostada ayaa si isdaba joog ah u kordheysa in ka badan labaatan sano. Inta ugu badan oqolkiiba dadka door bidaaya inay ku codeeyaan boostada sannadihii la soo dhaafay, xafiiska Diiwaan-hayaha waxuu kobciyay hawlihiisa, korodhiyay awoodda oo uu u diyaarsan yahay in uu si sax ah oo ammaan ah u maareeyo waraaqaha codbixinta boostada.

Diyaargarawgani waxa uu noqday mid lagu guulaystay markii la maamulayay doorashadii guud ee madaxweynaha ee Nofeember 2020. Sababo la xiriira cudurkii safmarka COVID-19 ee adduunka, labada Awaamiir ee Barasaabka (N-64-20 iyo N-67-20), iyo sharciga la xiriira (Golaha Sharciga 860 - Berman iyo Senate Bill 423 - Umberg) oo u oggolaanaya Diiwaan-hayaha Codbixiyayaashu inay qabtaan doorashada guud ee madaxweynaha iyada oo la raacayo moodheelka codbixinta ee "VCA-like", xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa boostada u diray in ka badan 1.96 milyan oo codbixiyeyaal firfircoon oo ka diiwaan gashan degmada wuxuuna diyaariyay 235 goob codbixin oo qof ahaan loo imaanayo oona furan afar maalmood, iyo 125 goobood oo lagu rido warqadah codbixinta boostada waxayna furan yihiin ku dhawaad hal bil.

Diiwan-hayaha ayaa mar kale shaqeeyay sida ku cad moodheelka "VCA-like" Sebtembar 14, 2021, Doorashadii ku celinta Barasaabka California. In ka badan 1.96 milyan waraaqood ayaa loo diray codbixiyayaasha firfircoon ee ka diwaangashan degmada, 131 goobood oo lagu rido waraaqaha codbixinta boostada ayaa furnaa ku dhawaad hal bil iyo 221 goobood si qof ahaan loo imaado ayaa furnaa afar maalmood si qof ahaan looga codeeyo.

Doorashadii hordhaca ahayd ee Juun 2022 waxay ahayd doorashadii ugu horreysay ee gobolka oo dhan lagu qabto iyadoo la raacayo moodheelka lagaga codeeya xarunta iyadoo 93% (629,276) ee codbixiyayaashu ka qaybqaateen doorashada ay soo celiyeen warqaddooda

codbixinta boosta iyo 7% (45,332) qof ahaan ugu codeeyeen xarunta codbixinta. Si la mid ah doorashooyinkii hore xogtani waxay la socotaa isbeddelka Degmada San Diego ee codbixiyayaashu waxay door bidaan ku habboonaanta codbixinta boostada.

Isbeddelku wuxuu sii socday doorashadii guud ee Nofeembar 2022 halkaas oo mar labaad, in ka badan 1.9 milyan oo waraaqo codbixinta boostada loogu diray qof kasta oo firfircoon oo ka diiwaan gashan gobolka. Doorashadii guud 90% (939,102) codbixiyeyaashii ka qaybqaatay waxay soo celiyeen warqadii codbixinta ee boostada loogu diray halka 10% (104,388) ay qof ahaan uga codeeyeen xarunta codbixinta.

Daabacaadda Warqada Codbixinta iyo Diyaarinta Boosta ku soo dirista

Xafiiska Diiwan-hayuhu waxa uu leeyahay qof shahaado dawladeed u haysta inuu maarayn kara daabacaadda warqada codbixinta boostada iyo awoodda inuu ku diro boostada. Xafiisku waxa uu sidoo kale sii waday wada shaqayn wakhti dheer oo adag oo uu la leeyahay xafiskiisa deegaanka ku yaala ee Adeegyada Boostada ee Maraykanka si loo hubiyo wakhtiga ku haboon geynta iyo soo celinta warqadaha cod bixinta.

Xidhmada ku codeynta boostada waxa loo diraa codbixiyayaasha iyadoo ay ku jirto baqshad cad oo ay ku suntan tahay Calaamadda Boostada Doorashada Rasmiga ah waxaana ku jira kuwan soo socda:

- Baqshad jaale ah oo lagu soo celinayo warqada codbixinta
- Warqada codbixinta rasmiga ah, oo laga yaabo inay ku qoran tahay kaarar badan oo codbixineed iyadoo ku xiran inta tartan ee ka jirta doorashada
- Tilmaamaha sida loo dhammaystiro loona soo celiyo warqada codbixinta
- Goobta ugu dhow ee leh sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta oo ay la socoto tilmaamaha liisaska dhamaystiran iyo saacadaha shaqada ee [sdvote.com](https://www.sdvote.com)
- Istiikarka "I Voted (Waan Codeeyay)"

Ka shaqaybta Waraaqaha Cod bixinta ee lagu soo celiyay Boostada

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa sanado badan galiyay si uu u maamulo ka shaqaynta waraaqaha codbixinta ee lagu soo diray boostada. Xafiisku hadda waxa uu ku shaqeeyaa mishiinnadiisa xawaaraha sare u leh kala-soocidda waraaqaha lagu soo diray boostada ee loo isticmaalo in looga shaqeeyo baqshadaha waraaqaha codaynta ee la soo celiyay. Mashiinnadan kala-soocidda waxay sawir ka qaadaan baqshad kasta oo la soo celiyo waxayna la socdaan in baqshadda codbixinta la soo celiyay. Sawirka saxiixa baqshadda la soo celiyay ayay shaqaaluhu adeegsadaan si ay u sameeyaan isbarbardhigga saxiixa oo ay go'aamiyaan haddii saxiixu la barbar dhigo saxiixa cod-bixiyaha ee faylka ku jira. Xawaaraha qalabka kala-soocidda boostada, dhaxgelintiisa nidaamka xaqiijinta saxiixa, iyo adeegsiga mishiinnada soo saarista otomaatiga ah ayaa u oggolaaday xafiiska Diiwaan-hayaha inuu si hagar la'aan ah u maareeyo mugga waraaqaha codbixinta boostada ee la soo celiyay.

Tirinta Waraaqaha Codbixinta ee Lagu soo celiyay Boostada

Xafiiska Diiwan-hayaha waxa uu leeyahay sideed iskaanar oo awood sare leh kuwaas oo iskaan ku samayn karo in ka badan 10,000 oo waraaqood saacadiiba iskaanar kasta. Kuwan waxaa la

soo iibsaday 2019 waxayna leeyihiin in ka badan labanlaab awoodda iskaan samaynta. Xafiisku waxa uu heli karaa 40 kale oo iskaanarada Canon ah kuwaas oo iskaan ku samayn kara in ka badan 4,000 oo waraaqood saacadiiba iskaanar kasta waxaana la isticmaali karaa marka awood dheeraad ah loo baahdo inta lagu jiro wareega doorashada.

Dabagalka Warqadaha Codbixinta ee Boostada

Xafiiska diwaan-hayaha waxa uu isticmaalaa Nidaamka Xoghayaha Dawliga ah ee Away Warqadaydi Codbixinta (Where's My Ballot system) iyadoona loo sii marayo lagu shaqeeyo BallotTrax. Nidaamkani waxa uu siinayaa daah-furnaan dheeri ah oo loogu talagalay codbixiyayaasha heerka ay marayso warqaddooda codbixinta ee lagu soo diray boostada. Codbixiyayaashu waxay heli karaan ogaysiisyo marka amaanka baqshadda la soo celiyay oo ay ku lifaaqan tahay warqadda cod bixinta ay dhex maraysa heerarka kala duwan ee boostada. Warqadaha codbixinta boostada waxaa lagu raadraacaa iyadoo la isticmaalayo Barkoodhka Boostada Sirdoonka ah (IMB) kaas oo Adeegga Boostada Maraykanku isticmaalo si uu ula socdo marka warqadaha la diro iyo marka loo soo celiyo xafiiska Diiwaan-hayaha.

Xarunta Codbixinta iyo Goobaha leh Sanduuqa Lagu Rido Warqada Codbixinta

§4005(a)(10)(B)

VCA waxay dejiyay shuruudo faahfaahsan iyo qaacidooyin lagu sameeyo meelaynta iyo meelaha laga dhigo xarumaha codbixinta iyo goobaha la geeyo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta. Xarumaha codbixinta iyo goobaha sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta ayaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo tixgalino iyo shuruudo gaar ah oo ay ka mid yihiin:

- U dhawaanshaha gaadiidka dadweynaha
- U dhawaanshaha bulshooyinka taariikh ahaan lagu yaqaano isticmaalka codbixinta boostada ee hooseysa
- U dhawaanshaha xarumaha dadweynaha
- U dhawaanshaha bulshooyinka luuqadooda dhifka tahay isticmaalkeeda
- U dhawaanshaha codbixiyayaasha naafada ah
- U dhawaanshaha bulshooyinka ay hooseyso lahaanshahooda baaburta guriga
- U dhawaanshaha bulshooyinka dakhligoodu hooseeyo
- U dhawaanshaha bulshooyinka leh codbixiyaal u qalma codeynta oona aan u diiwaan gashanayn inay codeeyaan
- U dhawaanshaha dadka juqraafi ahaan go'doonsan, oo ay ku jirto dhulka ay dagaan Dadka u dhashay Mareykanka
- U dhawaanshaha kambaasyada kulliyadda ama jaamacadda
- Laga heli karo baarkin ahna bilaash
- Fogaanta iyo waqtiga ay tahay inuu codbixiyuhu ugu socdaalo baabuur ama gaadiidka dadweynaha
- Hababka ee ay u codeyn karaan codbixiyayaasha naafada ah
- Sida ay yihiin taraafikada
- Xulashooyinka xarunta guurguurta ama nooc xilliga kooban meel la geeyo

Qaacidada iyo Tixgelinada Xarunta Cod bixinta

§4005(a)(10)(I)(vi)(I)

VCA waxay dejiyay qaacido lagu go'aaminayo tirada xarumaha cod bixinta iyadoo lagu salaynayo tirada codbixiyayaasha diiwaangashan. Goboladu waxaa la farayaa in hal xarun cod bixin oo shaqaysa 11 maalmood 50,000 oo cod bixiye ah iyo hal xarun oo 4 maalmood ah 10,000 oo cod bixiyayaal isdiiwaangeliyay. Iyada oo ku saleysan algoordamka lagu sheegay VCA, inta ugu yar ee loo baahan yahay waa 39 xarumood oo cod bixin ah oo furan 11 maalmood, oo ay ku jirto Maalinta Doorashada, iyo ugu yaraan 193 xarumo cod bixineed oo furan afar maalmood, oo ay ku jirto Maalinta Doorashada, gudaha Degmada San Diego.

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa bixin doona xarumo cod bixin oo 4-maalmood oo dheeri ah shaqeeya halkii ay noqon lahaayeen kuwa ugu yar ee loo baahan yahay. Degmada San Diego waxay ka shaqayn doontaa ku dhawaad 39 xarumo cod bixineed oo furan 11 maalmood, oo ay ku jirto Maalinta Doorashada iyadoona ay dhammaan furan yihiin afarta maalmood ee ugu danbeeya doorashada ka dhacaysa Degmada San Diego oo dhan. Xarumaha cod bixinta waxay leeyihiin laba "maalmood oo furnaan ah", oo ay jiraan tiro badan oo xarumo cod bixineed oo shaqeynaya inta lagu jiro afarta maalmood ee u dambeeya codbixinta oo leh saacadaha oo ee codbixinta la kordhiyay Maalinta Doorashada.

Kordhinta tirada goobaha waxay awood u siinaysaa in lagu meeleeyo xarumo cod bixin oo dheeri ah meelaha baahiyaha gaarka ah qaba iyo bulshooyinka go'doonsan sida Borrego Springs, Boulevard, Campo, Descanso, Rincon, iyo Warner Springs.

Shuruudaha Ugu Yar ee laga rabo Xarunta Codaynta

Xarumaha cod bixinta ayaa lagu go'aamiyay iyadoo lagu salaynayo shuruudaha lagu dejiyay sharciga, sida ay ku isticmaali karaan codbixiyayaasha qaba naafanimada iyo baahiyaha luqadda, goobta la heli karo, iyo jawaab celinta dadweynaha. Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa isticmaali doona xogta codbixiyaha iyo dadweynaha si uu uga caawiyayo doorashada meelaha ugu fiican ee xarumaha cod bixinta.

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa aqoonsaday oo uu sii wadi doonaa inuu qiimeeyo tas-hiilaadka suurtagalka ah si loo hubiyo in goobaha loogu qaybiyo degmada San Diego oo dhan si loo helo fursad weyn oo loogu talagalay dhammaan codbixiyayaasha.

Doorashada Goobta Xarunta Codbixinta

VCA waxay u baahan tahay degmooyinka inay tixgeliyaan ugu yaraan afar iyo toban shuruudood marka la dhisayo xarumaha codbixinta. Xafiiska diiwan-hayaha waxa uu isticmaalaa qalabka dhisida Center for Inclusive Democracy (CID) iyo xogta juqraafiyeed ee hadda la heli karo ee SanGIS si loo tixgeliyo dhammaan shuruudaha loo baahan yahay. Xafiiska diiwan-hayaha waxa uu bixiyaa marin u helka qalabka lagu dhiso xarun CID ee is dhexgalka leh kaas oo u ogolaanaya isticmaalaha in uu raadiyo uuna qiimeeyo meel kasta oo la soo jeediyay iyada oo ka soo horjeeda shuruudaha loo baahan yahay (ka eeg sharaxaadda Xarunta Qalabka Lagu Dhiso Center for Inclusive Democracy bogga 24).

In kasta oo Qalabka Lagu dhiso Xarun CID waxay bixisaa hab degdeg ah oo wax ku ool ah oo lagu qiimeeyo goobaha la soo jeediyay iyada oo loo eegayo shuruudaha loo baahan yahay, si toos ah uma qeexo halka goobaha codbixinta lagu aqoonsan doono laguna xaqiijin doono.

Qiimaynta Sahan-dhuleedka Xarunta Codbixinta

Marka laga soo tago tixgelinta shuruudaha lagama maarmaanka ah, qiimaynta sahan-dhuleedka xarunta codbixinta waxay tixgalinaysaa qaar badan oo ka mid ah qaybaha kale ee doorashada goobta kuwaas oo, in kasta oo aanay u baahnayn VCA, waxay saamaysaa geedi socodka dhisida xarunta codbixinta. Qaar kamid ah tusaalooyinka waxyaabaha lagu xulasho goobta waxaa ka mid ah jidka lagu safrayo, cabbirka qolka codbixinta, qabida nalal ku filan (gudaha iyo dibaddaba), aagga juqraafi ee goobta la soo jeediyay, lahaanshaha internetka, iyo xaddiga korontada.

Hannaankii Dadka Ka Shaqaalaysiinta Xarunta Codbixinta

Natiijadii ka soo baxday cudurkii safmarka caalamiga ee COVID-19 iyo sharciga xaaladaha degdegga ah Xafiiska Diiwaan-hayaha wuxuu ku qabtay labadaba Nofeembar 2020 doorashadii madaxweynaha guud iyo doorashada ku celinta Barasaabka ee Sebtembar 2021 iyadoo la raacayo modheel codbixin oo "VCA u eg" iyadoo lahayd 221 ilaa 235 goob codbixineed oona furnaa afar maalmood oo laga wada codaynayay gobolka oo dhan. Goobahan codaynta ayaa mar kale dib loo eegay oona la qiimeeyay si loo go'aamiyo inay buuxinayaan shuruudaha ugu yar ee laga rabo xarunta codbixinta si ay horey ugu socoto.

Cilmi-baarista Xarunta

Iyadoo lagu salaynayo hannaankii shaqo qorista ee ka horeeya Nofeembar 2020, liiska in ka badan 500 oo goob codbixineed ayaa dib loo eegay iyagoona lala xidhiidhay si ay ugu adeegaan iyagoona noqonaya xarumaha codbixinta ee suurtoogalka ah haddii shuruudaha hore la buuxiyo.

Xarumaha aan dawliga ahayn ayaa lala xidhiidhay si looga wadahadlo sidii loo heli lahaa iyo kharashyada iman kara. Xarumaha dadweynaha ayaa lala xiriiriyay si ay u muddeeyaan qiimaynaha sahan-dhuleedka xarunta codbixinta.


Iyada oo la raacayo cilmi-baadhisto goobta codbixinta ee hore loo isticmaalay, guryaha dawlada iyo xarumaha ku yaala gudaha degmada oo dheeraad ah ayaa la qiimeeyaa haddii loo baahdo waxaana lagu daraa liiska sare si loogu sameeyo cilmi-baadhis dheeraad ah. Xarumaha ku habboon, oo aan u shaqayn sidii goobaha codbixinta, ayaa lala xidhiidhay si ay u sameeyaan qiimaynada goobta xarunta codbixinta. Intaa waxaa dheer, iyadoo lagu salaynayo xogta dadweynaha, magaalooyinka waxaa lagu qiimeeyay tiro xarumo codbixineed ee la beegsaday.

Liiska Xarumaha Codaynta Suurtogalka ah ee leh Maalmo iyo Saacado La shaqeeyo §4005(a)(10)(I)(vi)(III), §4005(a)(10)(I)(vi)(VI)

Goobaha xarunta codbixinta ayaa la doortay iyadoo lala kaashanayo ra'yi-celinta dadweynaha iyo shuruudaha sida uu sharcigu dhigayo. Liiska ugu dambeeya ee xarumaha codbixinta ee la doortay waxa lagu daray Buug-yaraha Macluumaadka Codbixiyaha oo laga heli karo websaydka Diiwaan-hayaha, sdvote.com inta lagu jiro wareega kasta oo doorasho.

Laga bilaabo toban maalmood Maalinta Doorashada ka hor, ku dhawaad 39 xarumood oo codbixineed ayaa furmi doona ugu yaraan siddeed saacadood maalin kasta. Marka lagu daro ~179 xarumood ayaa furmi doona saddex maalmood ka hor Maalinta Doorashada iyagoona shaqayn doona ugu yaraan siddeed saacadood maalin kasta ilaa Maalinta Doorashada, markaas oo ay dhammaan xarumaha codbixinta ay furan yihiin laga bilaabo 7:00 a.m. ilaa 8:00 p.m. Ka eeg bogga 92 Shaxda Goobaha 11 Maalmood iyo 4 Maalmood wakhtiga daabacaada.

Khariidadda Goobaha lagu soo jeediyay inay noqdeen Xarumaha Codbixinta



Qaabka Loo qaabeeyay Xarunta Codbixinta

§4005(a)(10)(I)(vi)(XI)

Xarumaha codbixinta waxay bixiyaan adeegyo iyo dheefooyin la xoojiyey kuwaas oo sugan oona habboon. Dhammaan xarumaha codbixinta waxa lagu qalabayn doonaa ugu yaraan afar liis oo elektaroonig ah (electronic pollbooks, or e-pollbooks) oo u oggolaanaya shaqaalaha xarunta codbixinta inay si degdeg ah oo fudud u xaqiijiyaan heerka iyo u-qalmitaanka cod-bixiyaha, iyo ugu yaraan afar ilaa siddeed qalab oo calaamadaynta warqada codbixinta ah ah. Aaladaha lagu calaamadeeyo warqadaha codbixinta waxaa si faahfaahsan loogaga hadlay bogga 33.

Goobaha codbixinta, codbixiyuhu wuxuu awood u yeelan doonaa:

- Inuu qof ahaan u codeeyo ama uu boostada ku diro warqadda codbixinta oo horey loogu codeeyay (ku xidhan baqshadda soo celinta)
- Inuu isticmaalo aaladda calaamadaynta codbixinta ee shaashadda taabashada si uu ugu calaamadeeyo xulashooyinka oo uuna ku daabacdo warqadda codbixinta ee rasmiga ah
 - Dhammaan aaladaha calaamadaynta warqada codbixinta si fudud ayaa loo isticmaali karaa taasoo u oggolaanaysa cod-bixiyayaasha naafada ah inay si madaxbannaan oona gaar ah u codeeyaan
- Inuu qof ahaan ugu codeeyo isagoo isticmaalaya warqadda codbixinta ee uu ku helay boostada ka dib markaad ka hubiso oodna ku saxiixdo liis elektaroonig ah
- Haddii aad khalad samaysay ama aad lumisay warqadda codbixinta ee aad ku heshay boostada, taa beddelkeeda waxaad u codayn kartaa qof ahaan adiga oo isticmaalaya aaladda calaamadaynta codbixinta ee xarun kasta oo codbixineed
- Inaad hesho kaalmad luuqadeed
- Iska diwaangeliso oodna codeeyso isla maalintaas
- Inaad cusboonaysii macluumaadka diwaangelinta codbixiyaha (ciwaanka, magaca, doorashada xisbiyada siyaasadda)

Xafiiska diiwan-hayaha wuxuu hirgeliyay habraacyada habaynta xarunta codbixinta si loo hubiyo in dhammaan qalabka lagu calaamadeeyo warqada codbixinta iyo qolalka codbixinta loo hagaajiyay hab u oggolaanaya cod-bixiyuhu inuu si madax-bannaan iyo si gaar ah u calaamadeeyo warqadiisa codbixinta. Hababka loo qaabeeyay waxay xasaasi u noqon doonaan baahiyaha isticmaalka codbixiyayaasha waa la hagaajin doonaa si loo waafajiyo qaababka kala duwan iyo cabbirka qolka goob kasta (eeg bogga 91 ee Lifaayada muunada hababka loo qaabeeyo).

Hababka loo qaabeeyo xarunta codbixinta kasta waxay ka kooban tahay shan saldhig:

1. Saldhiga leh Baaga Lagu Rido Warqada Codbixinta Boostada: Waxay aqbashaa baqshadaha ay ku soo celiyaan warqadda codbixinta boostada ee codbixiyayaasha.
2. Saldhiga Salaamaha: Wuxuu salaamaa codbixiyayaasha, maamulaa safaf kasta, bixiyaa foomamka imaanshaha, sabuuradaha, qalinka, wuxuuna ku haggaa codbixiyayaasha goobtii ay iska xaadirin lahaayeen
3. Goobta La iska xaadiro: Hubiyaa codbixiyayaasha, si shuruud ah ayuu u diwaangeliyaa codbixiyayaasha asagoona siiya kaalmo
4. Goobta Codbixinta: Codbixiyayaashu waxay si gaar ah iyo si madax-bannaan ku calaamadeeyaan xulashadooda ayagoo isticmaalaya aalada lagu calaamadeeyo warqada codbixinta ama goobta codbixinta (calamaynta warqadda lagu soo diray boostada)
5. Goobta Codka lagu dhiibanayo: Shaqaale ka shaqeeya goobta codbixinta ayaa ku ridaya sanduuqa rasmiga ah ee codbixinta wuxuuna siinayaa codbixiye istiikar ay ku qoran tahay "Waan Codeeyay"

Ogsoonow: Inkasta oo aanay ahayn "goob", Miiska uu tagi karo Codbixiyaha waxa kale oo lagu dhex daray qaabaynta xarunta codbixinta ee sida joogtada ah loogu meeleeyo agabyada codbixiyayaasha ee laga bixiyo xarun kasta oo codbixineed.

Tirada Shaqaalaha ka shaqeeya Xarunta Codbixinta

§4005(a)(10)(I)(vi)(IX)

Qiyaasta tirada shaqaalaha ka shaqeeya xarunta codbixinta waxay ku salaysan tahay tirada xarumaha codbixinta ee shaqeeya 11 maalin iyo 4 maalin, tirada goobaha layska soo xaadiriyo iyo aaladaha lagu calaamadeeyo warqada codbixinta iyadoo la xiriirta dadka la filayo inay imaadaan xarunta codbixinta iyo jadwal taageeraya dhammaan galinada maalinta oo dhan ah. Qiyaasta tirada shaqaalaha ka shaqeeya xarunta codbixinta ee loo baahan yahay ayaa la xisaabiyaa iyadoo lagu saleynayo celcelis ahaan lix shaqaale ah oo looga baahan yahay xarumaha shaqeeya 11 maalmood, iyo laba iyo toban shaqaale inta lagu jiro afarta maalmood ee ugu dambeeya ee laga codeeya dhammaan xarumaha codbixinta. Celcelis ahaan waxay tixgalinayaan inay jiri karaan kala duwanaansho tirada shaqaalaha looga baahan yahay xarun kasta oo codbixineed.

Nooca Xarunta Codbixinta	# Goobaha	Nooca Shaqaale	# Maalmood	Maalinta oo dhan Galino	Shaqaalaha la saadaaliyay
11-Maalmood	39	Shaqaale ah 6 qof	7 Maalmood	39 goobood x 6 shaqaale	234
		Shaqaale ah 12 qof	4 Maalmood	39 goobood x 6 shaqaale lagu daray	234
4-Maalmood	179	Shaqaale ah 12 qof	4 Maalmood	179 goobood x 12 shaqaale	2,148
Wadarta Saadaasha Loo baahan yahay (Dhammaan tirooyinka waa qiyaaso)	218				2,616

Tababarida Shaqaalaha ka shaqeeya Xarunta Codbixinta

Tababarida shaqaalaha ka shaqeeya xarunta codbixinta waxaa haga Heerarka Tababarka Shaqaalaha Codbixinta ee Xoghayaha Gobolka California. Buugga Tababarka Shaqaalaha Codbixinta ee degmada iyo agabyada kale ee tababarka waxaa laga eegi karaa websaydka Diiwaan-hayaha ee [Tababarka Shaqaalaha Codbixinta \(sdvote.com\)](http://sdvote.com). Agabkan waxa la soo dhigaa hal bil ka hor Maalinta Doorashada.

Qaacidada iyo Tixgelinada Goobta la dhigayo Sanduuqa Lagu rido Codbixinta §4005(a)(10)(I)(vi)(II)

VCA waxay dejisay qaacido lagu go'aaminayo tirada goobaha leh sanduuqa lagu rido warqada codbixinta iyadoo lagu salaynayo tirada codbixiyayaasha diiwaangashan. Degmooyinka waxa la farayaa in ay bixiyaan ugu yaraan laba goobood oo ka mid ah goobaha ay xukumaan halkaas oo ay doorashadu ka dhacayso ama ugu yaraan hal goob oo leh sanduuqa lagu rido warqada codbixinta 15,000 kasta oo codbixiyeyaal diiwaangashan ah. Diiwan-hayaha Codbixiyayaasha Degmada San Diego waxa uu bixiyaa ku dhawaad 140 goobood oo ay yaalaan sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta Degmada San Diego oo ka badan inta ugu yar ee loo baahanaa.

Shuruudaha ugu yar ayaa la tixgeliyey oona la qiimeeyay iyadoo la baarayo goobaha suurtagalka ah in la geeyo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta. Goobaha leh sanduuqa lagu rido warqada codbixinta waxay siiyaan codbixiyayaasha doorashooyin dheeraad ah si ay ugu ridaan warqadooda codbixinta si ammaan ah oona habboon. Dadaalka ugu wanaagsan ayaa la sameeyay si loo aqoonsado goobaha iyadoo la tixgalinayo inay jiraan daboolida kamaradaha amniga oo ku yaal meelo kala duwan marka loo eego xarumaha codbixinta iyo xafiisyada boostada. Watigii daabacaada waxaa jiray isku darka goobaha sanduuqyada lagu rido warqada codbixinta ee gudaha iyo dibadda.

Shuruudaha Ugu Yar ee laga rabo Sanduuqa Lagu rido Warqadaha Codbixinta §4005(a)(10)(I)(vi)(VI)

Marka lagu daro shuruudaha ugu yar ee VCA, xafiiska Xoghayaha Gobolka California wuxuu bixiyaa xeerar sida isticmaalka iyo shuruudaha luqadda. Sanaadiiqda lagu rido warqada cod bixinta ee kaligood ah ayaa loo qaabeeyey in lagu bixyo luuqad la rabay turjumaadeed in loogu dhajiyo sawiro ahaan sanduuqa cod bixinta, waxaana farshaxanka la sameeyay iyadoo la isticmaalayo kala duwanaansho sare si loo hagaajiyo akhrinta codbixiyayaasha aragga naafada ka ah. Xafiiska Diiwan-hayaha waxa uu qiimaynayaa suurtagalnimada astaamo dheeri ah si uu u taageero codbixiyayaasha naafada ah waxa uuna sii wadi doonaa la shaqaynta la-hawlgalayaasha bulshada si loo baadho dhaqamada ugu wanaagsan ee tixgelinta mustaqbalka.

Goobaha sanduuqa lagu rido cod bixinta, hadday tahay gudaha iyo dibaddaba, waxaa lagu go'aamiyay iyadoo lagu salaynayo shuruudaha lagu sheegay VCA, sida ay ku isticmaali karaan codbixiyayaasha qaba naafanimada iyo baahiyaha luqadda, goobta la heli karo, iyo jawaab celinta dadweynaha.

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa aqoonsaday goobaha si loo hubiyo in sanduuqyada lagu rido warqada codbixinta loo qaybiyo dhammaan Degmada San Diego si loo helo fursad weyn oo loogu talagalay dhammaan codbixiyayaasha.

Xafiiska Diiwaan-hayaha wuxuu raacay "Xeer-hoosaadka California (CCR) Title 2. Maamulka, Qaybta 7aad, Cutubka 3. Qodobka 1. Ku codee Warqada Cod bixinta Boostada ee Sanduuqa lagu rido iyo ku codee Goobaha la geeyo warqada codbixinta" tilmaamaha kuwaas oo siinaya tillaabooyinka amniga shuruudaha naqshadeynta sanduuqa codbixinta, la socodka amniga iyo hababka isticmaalka inta lagu jiro xilliga cod bixinta ay socoto. Naqshadaynta iyo luqadda lagu daabaco sanduuqyada cod bixinta waxay ku wargelinaysaa dadweynaha in sanduuqu yihiin mid rasmi ah oo sugan. Sanaadiiqda cod bixinta waxay sidoo kale leeyihiin badbaado ka hortag ah sida dahaarka ka hortagga in la jabsado, sifada dabka ka ilaalisa, waxayna ka samaysan yihiin

aalad tayo sare leh, bir culus oo aan miririn oona leh albaabo laba-qufule ah, iyo aalad bir ka samaysan oo aan bir la galin karo fareemkeeda.

Qiimaynta Sahan-dhuleedka Sanduuqa Lagu rido Warqadaha Codbixinta

VCA waxay u baahan tahay degmooyinka inay tixgeliyaan ugu yaraan afar iyo toban shuruudood marka la dhisayo goobaha leh sanduuqyada lagu rido warqada codbixinta. Xafiiska diiwan-hayaha waxa uu isticmaalaa qalabka dhisida Center for Inclusive Democracy (CID) iyo xogta juqraafiyeed ee hadda la heli karo ee SanGIS si loo tixgeliyo dhammaan shuruudaha loo baahan yahay. Xafiiska diiwan-hayaha waxa uu bixiyaa marin u helka qalabka lagu dhiso xarun CID ee is dhexgalka leh kaas oo u ogolaanaya isticmaalaha in uu raadiyo uuna qiimeeyo meel kasta oo la soo jeediyay iyada oo ka soo horjeeda shuruudaha loo baahan yahay (ka eeg sharaxaada Xarunta Qalabka Lagu Dhiso Center for Inclusive Democracy bogga 24).

In kasta oo Qalabka Lagu dhiso Xarun CID waxay bixisaa hab degdeg ah oo wax ku ool ah oo lagu qiimeeyo goobaha la soo jeediyay iyada oo loo eegayo shuruudaha loo baahan yahay, si toos ah uma qeexdo goobaha leh sanduuqyada lagu rido warqada codbixinta.

Marka laga soo tago shuruudaha ugu yar, xeelado dheeraada ayaa la tixgeliyey marka la dooranayo goobaha la geynayo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta. Shuruudahan, iyadoo aysan u baahnayn VCA, waxay saameeyaan nidaamka goob dhisida, waxayna hagaajiyaan rabitaanka goobta. Qaar kamid ah tusaalooyinka waxyaabaha lagu xulasho goobta waxaa ka mid ah, lahaanshaha kamarada amniga goobta, helitaanka boosaska baarkinada wakhtiga gaaban/ku meel gaadhka ah ee loogu talagalay kooxda soo qaada warqadaha codbixinta, iyo lahaanshaha nal ku filan goobta la soo jeediyay.

Hannaankii Dadka Ka Shaqaalaysiinta Goobta leh Sanduuqa Lagu rido Warqada Codbixinta

Xidhmad macluumaad ah ayaa la sameeyay kaas oo ay ku jiraan warqad sharaxaysa sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta oo leh tilmaamo, rajooyin, iyo su'aalaha inta badan la isweydiyo. Xirmada waxaa loo isticmaalay wacyigelinta goobaha suurtagalka ah waxayna ka bixisay macluumaad faahfaahsan hanaanka sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta. Xirmada waxaa ku jiray heshiiska sanduuqa lagu rido warqada codbixinta si dhammaan dhinacyadu ay u yeeshaan faham cad oo ku saabsan doorarka iyo waajibaadka, iyo heshiiska inay xaruntu isticmaayo iyadoona si joogta ah ugu isticmaasho goobaha waqti xaadirkan jira. Macluumaadkan waa la cusboonaysiiyay oo waa la qaybiyay ka hor inta aan wax shaqa qoris ah aan laga samaynin goobaha cusub ee sanduuqa lagu rido cod bixinta ay yaalaan ka hor wareeg kasta oo doorasho.

Goobihii hore ee cod bixinta iyo goobaha la geeyo warqada codbixinta ee boostada ayaa dib loo eegay si loo go'aamiyo in goobta ay taageeri karto sanduuqa lagu rido warqada codbixinta. Iyadoo si isku mid ah loola shaqeynayo doorashada goobta xarunta cod bixinta, goobaha suurtagalka ah in la geeyo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta ayaa la aqoonsaday kuwaas oo siin doona doorashooyin dheeraad ah codbixiyaasha si ay ugu ridaan warqadaha codeynta. Intaa waxaa dheer, cilmi-baaris ayaa laga sameeyay goobaha suurtagalka ah ee magaalada, maktabadaha, kambaaska kuleejka, iyo meelaha kale ee la heli karo. Xarumaha tafaariiqda ee caanka ah iyo guryaha gaarka loo leeyahay ayaa sidoo kale la aqoonsaday. Sida hanaanka shaqaaleysiinta xarunta codbixinta, magaalooyinka iyo meelaha ugu baahida badan in loo geeyo sanduuqyada lagu rido warqada cod bixinta ayaa la kala horraysiiyay.

Goob kasta oo suurtagal ah ayaa lagu sameeyay qiimeynta goobta si loo go'aamiyo ku habboonaanta iyo helitaanka.

Liiska Sanduuqyada Lagu rido warqada Codbixinta Suurtogalka ah lehna Maalmo iyo Saacado La shaqeeyo


§4005(a)(10)(I)(vi)(IV), §4005(a)(10)(I)(vi)(VII)

Goobaha la geynayo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta ayaa la doortay iyadoo lala kaashanayo ra'yi-celinta dadweynaha iyo shuruudaha sida uu sharcigu dhigayo. Liiska ugu dambeeya ee goob la doortay in la geeyo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta waxa lagu daray Buug-yaraha Macluumaadka Codbixiyaha oo laga heli karo websaydka Diiwaan-hayaha, sdvote.com inta lagu jiro wareega kasta oo doorasho.


Goobaha leh sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta waxay furnaan doonaan saacadaha shaqada ee caadiga ah ee xarunta kuwa gudaha ku yaal iyo kuwa bannaanka ku yaalba waxaa la heli doonaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Dhammaan goobaha leh sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta waxay xidhmi doonaan Maalinta Doorashada, markay saacadu tahay 8:00 p.m.

Ka eeg bogga 92 ee Lifaayada Jadwalka Goobaha Sanduuqa Lagu rido Warqada Codbixinta wakhtiga la daabacayo.

Khariidadda Goobaha La Soo Jeediyay in laga dhigo Goobaha Sanduuqa Lagu Rido Warqada Codbixinta



Qariirada Goobaha Lagu rido Warqada Codeynta waqtiga la Daabacayo



Xarumaha Codaynta iyo Qalabka Lagu Dhiso Goobaha La geynayo Sanduuqa Lagu Rido warqada Codbixinta iyo Nidaamka La adeegsaday

Si ay gacan uga geysato doorashada goobaha codbixinta iyo goobaha la geynayo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta, xafiiska Diiwan-hayaha wuxuu isticmaalaa [Qalabka Lagu dhiso Center for Inclusive Democracy \(CID\)](#) iyo tignoolajiyada Geographic Information System (GIS) ee gobalka si ay gacan uga geysato aqoonsiga goobaha ugu wanaagsan ee xarumaha codbixinta ee suurtagalka ah iyo goobaha la geyn karo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta. Tan waxaa lagu fuliyaa iyadoo la sawirayo dimugraafiga iyo xogta codbixiyayaasha, goobahii cod bixinta hore, macluumaadka boostada, xogta tirakoobka, iyo macluumaadka xuduudaha ee heer bulsho.

Iyada oo la adeegsanayo xariiqda qalabka lagu sameeyo xarunta, oo ka kooban unugyo nus mayl ah oo daboolaya gobolka oo dhan, "goobaha ku habboon" ayaa la aqoonsaday oo la barbar dhigay goobaha codbixinta kaydsan, goobaha laga codeynayo iyo guryaha cusub iyo tashiilaadka dadweynaha. Qiimaynta sahan-dhuleedka ayaa la sameeyay si loo go'aamiyo haddii goobuhu ay buuxinayaan shuruudaha ugu yar ee loo baahan yahay iyo qaybaha kale ee lagu doorto xarunta codbixinta ama goobta la geynayo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta.

Si looga sii caawiyo hanaanka, xogta CID waxaa lagu dhex daray xarunta codbixinta ee suurtagalka ah iyo goobaha la geynayo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta iyadoo ku salaysan goobaha codbixinta kaydsan, goobaha laga codeynayo, kaabayaasha dadweynaha, iyo goobaha bulshada. Tani waxay u ogolaanaysaa sahaminta xogta jirta, soo jeedinta goobo cusub, iyo la socodka horumarka hanaanka xulashada goobta si loo gaadho go'aano xog ogaal ah.

Nidaamyada la raacayo

Isticmaalka qalabka goob samaynta CID, walxaha xulashada goobta, iyo tignoolajiyada GIS, Diiwan-hayaha Degmada San Diego ee Codbixiyayaasha ayaa aqoonsaday goobaha dhammaan "aagaga ku haboon" ee Degmada si loogu martigeliyo xarumaha codbixinta iyo goobaha la geynayo sanduuqa lagu warqada cod bixinta.

Foomka Talo-bixinta Xulashada Goobta ee ku jirta Websaydka

Hab kale ee loogu doorta qiimeynta xarunta codbixinta iyo goobaha la geynayo sanduuqa lagu rido codbixinta waa ra'yi-celinta dadweynaha oo laga helay Foomka Talo-bixinta Goobta ee [sdvote.com](#). Tani waxay u ogolaatay dadwaynaha inay bixiyaan magaca xarunta, ciwaanka, iyo sababta ay u soo jeedinayaan goob. Xafiiska Diiwaan-hayaha wuxuu sii wadaa inuu daba galo jawaab celinta la xiriirta xarumaha cod bixinta iyo goobaha la geynayo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta.

Adeegyada Codbixiyayaasha Naafada ah

§4005(a)(10)(I)(vi)(X)

Diiwaan-hayaha Codbixiyayaasha Degmada San Diego waxaa ka go'an inuu taageero codbixiyayaasha naafada ah. Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu sii wadaa kordhinta iyo cusboonaysiinta adeegyada codbixiyayaasha naafada ah iyada oo loo marayo hanaanka wada shaqayneed ee bulshada iyo guddiga la-talinta iyo iyada oo la adeegsanayo sahan gelitaan dhamaystiran oo la cusboonaysiiyay.

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu taageeraa codbixiyayaasha naafada ah isagoo:

- Hubinaya in dhammaan xarumaha codbixinta ay buuxiyaan shuruudaha ay si fudud loo adeegsan karo
- Isticmaalaya aaladaha calaamadaynta warqada codbixinta ee leh tignoolajiyada taageerayo isticmaalka ee hadda la heli karo (si faahfaahsan ayaa looga hadlay bogga 33).
- Siinaya inay meel ka baxsan xarumaha codbixinta ay kasoo codeeyaan
- Siinaya awooda ay uga dhiiban karaan warqada codbixinta si madax banaan guriga iyada oo loo marayo nidaamka codaynta fogaan araga degmada ee lagu heli karo nidaamka boostada (RAVBM)
- Siinaya agabka cod bixinta oo maqal ah iyo iyadoo ku daabacan far waaweyn
- Ku bixinaya turjumaada ASL xarumaha codbixinta
- Siinaya miiska isticmaalka codbixiyayaasha ee xarumaha codbixinta oo leh agab luqadeed iyo dhigaalo

Sahanka Si fudud u isticmaalida goobta ee La cusboonaysiiyay

§4005(a)(4)(C)

Si loogu hogaansamo shuruudaha si fudud u isticmaalida, Liiska Hubinta Si fudud u isticmaalida ee Xoghayaha Gobolka ayaa dib loo eegay, waxaana shuruudo dheeraad ah lagu daray Sahanka Goobta ay ka Codeynayaa Codbixiyayaasha ee Diwaan-hayaha si loo abuurto Sahanka Xarunta uu ka codeynayo Cod-bixiyaha ee Diiwaan-hayaha Degmada San Diego.

Nuqulka la cusboonaysiiyay wuxuu diiradda saarayaa baadhis qotodheer oo lagu sameeyo waddooyinka safarka ee gaadiidka dadweynaha, raadinta goobo leh tirada ugu badan ee meelaha baabuurta la dhigto ee la heli karo, iyo su'aalo dheeraad ah si loo kala saaro noocyada bambisyada.

Sahankii hore ayaa sidoo kale dib loo eegay si loo hubiyo in dhammaan su'aalaha sahanka hadda socda ay waafaqayaan Liiska hubinta Si fudud u isticmaalida ee Xoghayaha Dawladda iyo shuruudaha ku qoran VCA. Qaabka Sahanka Xarunta Codbixinta ayaa sidoo kale laga cusboonaysiiyay noocyadii hore ee waraaqaha iyo noocyadii elegtarooniga ahaa ee duugoobay oo loo beddelay barnaamij ku salaysan arji oo loo isticmaali karo aaladda elegtarooniga moobaylka.

Macluumaadka Adeegyada La siiyo Codbixiyayaasha Naafada ah oo lagu daray Buug-yaraha Macluumaadka Codbixiyaha iyo Tilmaamaha VBM §4005(a)(8)(B)(i)(IV)

Buug-yaraha Macluumaadka Codbixiyaha waxa ku qoran macluumaadka ku saabsan sida codbixiyayaasha naafada ah ay u codsan karaan caawimo, Lambarka telefoonka codbixinta ee Disability Rights California, iyo sida loola xidhiidho Diiwaan-hayaha Xafiiska Codbixiyaha wixii su'aalo guud ah. Intaa waxaa dheer, buug-yarahaan wuxuu qeexayaa in codbixiyaha aan awoodin in uu calaamadeeyo warqadda codbixinta uu keeni karo ilaa laba qof si ay uga caawiyaan codbixinta. Buug-yaraha waxa kale oo ka mid ah kaadhka boostada oo ay ku jiraan lacagta wax ku dirista boostada oo horey loo sii bixiyay oona loogu talagalay cod-bixiyayaasha si ay u codsadaan inay ku codeeyaan fogaan araga laguna soo diro boostada (RAVBM).

Tilmaamaha ku qoran warqadda codeynta boostada ayaa ku wargelinaya cod-bixiyayaasha helitaanka codsashada agabyada doorashada qaab ay isticmaali karaan.

Macluumaadka La heli karo ayaa La soo Dhigay Websaydka §4005(a)(10)(I)(i)(IV), §4005(a)(8)(B)(ii)

Diiwaan-hayaha websaydka Codbixiyuhu waxa uu ku siiyaa xogta dhammaan cod-bixiyayaasha qaab ay isticmaali karaan. Fiiro gaar ah ayaa la siiyay naqshadeynta websaydka si loo fududeeyo waafajinta akhristayaasha shaashadda iyo inay si fudud u isticmaalaan.

Websaydku wuxuu siinayaa codbixiyayaasha macluumaadka la xidhiidha hanaanka doorashada, diiwaangelinta codbixinta, sharciga VCA, iyo Qorshaha Maamulka Doorashada (EAP).

Websaydku waxa kale oo uu leeyahay [bogg codbixineed oo gaar ah oo la heli karo \(sdvote.com\)](http://sdvote.com) kaas oo bixiya macluumaadka ku saabsan adeegyada ay heli karaan codbixiyayaasha naafada ah, oo ay ku jiraan:

- Si fudud u isticmaalida xarunta codbixinta iyo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta
- Sharaxaada iyo tilmaamaha aalada lagu calaamadeeyo warqada codbixinta
- Dhigaalada loogu talagalay codbixiyayaasha naafada ah
- Ku codsashada cod bixinta fogaan arag ah warqada codbixinta ee boostada (RAVBM)

Websaydhku waxa ku jira macluumaadka noocyada adeegyada ay heli karaan codbixiyayaasha naafada ah, adeegyada laga heli karo xarumaha codbixinta, iyo kuwa kaloo badan. Waxa kale oo ka mid ah liiska xarumaha codbixinta iyo sanduuqyada lagu rido codbixinta oona leh qaab si fudud loo isticmaal karo doorasho kasta.

Sida Codbixiyaha Naafada ahi uu u codsan karo Warqadda Codbixinta Boostada, RAVBM, ama Warqadda Bedelka

§4005(a)(5), §4005(a)(10)(I)(ii)

U dhaqaaqista ka codaynta xarumaha codbixinta, qofka naafada ah wuxuu codsan karaa warqadda codbixinta boostada, RAVBM, ama warqadda beddelka ah ee codeynta isagoo isticmaalaya websaydka, iimaylka, taleefanka, foom qoraal ah, ama isagoo si shakhsi ahaan u imaanaya xafiiska Diiwaan-hayaha. Codbixiyuhu waxa kale oo laga yaabaa inuu RAVBM ka codsado kaarka boostada ee lacagtii dirista horey loo sii bixiyay oona ku jirto Buug-yare kasta oo ay ku qoran tahay Macluumaadka Codbixiyaha. Xulashooyinkan ka sokow, codbixiyayaashu

waxay sidoo kale awood u yeelan doonaan inay codsadaan beddelka warqadda codbixinta oo ay qof ahaan ugu codeeyaan xarun kasta oo codbixineed.

Si fogaan arag ah ugu Codeynta adigoo isticmaalaya Boostada (RAVBM) §4005(a)(8)(B)(i)(IV)

Codbixiyayaasha naafada ah ee ka diwaangashan Degmada San Diego waxay codsan karaan warqadda cod bixinta ee la soo dejisan karo iyagoo isticmaalaya nidaamka Diiwaan-hayaha ee lagu codeynaya fogaan araga iyadoo la isticmaalaya boostada (RAVBM). RAVBM waxay siisaa codbixiyayaasha naafada ah awoodda ay ku codsadaan inay marin u helaan warqadda codbixinta si elektaroonik ah. Warqada cod bixinta waxaa lagu soo dejisan karaa kombayutarka codbixiyaha, iyadoo lagu calaamadeeyay waxoo la isticmaalaya tignoolajiyada caawinta ee uu leeyahay codbixiyaha ka dibna la daabacay. Tilmaamaha waxaa lagu bixiyaa nidaamka RAVBM.

Sida warqadda codbixinta kasta oo lagu diro boostada, warqadaha codbixinta RAVBM waa in lagu xidhaa gudaha baqshadda soo celinta sida lagu sheegay tilmaamaha nidaamka, la saxiixo, laguna soo celiyo boostada ama xarun kasta oo codbixineed ama goobta rasmiga ah uu yaalo sanduuqa lagu rido warqada cod bixinta.

Tilmaamaha soo celinta ayaa sidoo kale laga heli karaa buug-yaraha ay ku qoran yihiin macluumaadka cod-bixiyaha loogu diro boostada cod-bixiye kasta ama ciwaanka iimaylka.

Nooca iyo Tirada Aaladaha calaamadaynta warqada cod bixinta ee La heli karo

§4005(a)(2)(B), §4005(a)(4)(D), §4005(a)(10)(l)(vi)(X)

Dhammaan xarumaha codbixinta ee Degmada San Diego waxay ku qalabaysan yihiin ugu yaraan afar ilaa siddeed aaladood oo si buuxda loo heli karo waxaana laga yaabaa inay balaadhiyaan tirada aaladaha ku xidhan cabbirka qolka codbixinta iyo baahiyaha codbixiyayaasha. Dhammaan codbixiyayaasha waxa loo soo bandhigay isticmaalka aaladaha calaamadaynta codbixinta ee la heli karo.

Codbixiyuhu waxa uu ku calaamadayn karaa warqaddooda codbixinta isaga oo isticmaalaya shaashada taabashada, aaladda dhegeysiga maqalka, ama tignoolajiyadooda caawinta shaqsiyeed. Aaladaha calaamadaynta warqada cod bixinta waxay siiyaan codbixiyayaasha naafada ah waayo-aragnimo codbixin oo madaxbanaan. Aaladaha calaamadaynta warqada codbixinta ayaa la diyaarin doonaa si ay ugu oggolaato dhammaan codbixiyayaasha fursad ay ugu dhiibtaan codkooda si gaar ah iyo si madaxbannaan. Aaladaha lagu calaamadeeyo warqadaha codbixinta waxaa si faahfaahsan loogaga hadlay bogga 33.

Nooca iyo Tirada wax ka beddelka Macquulka ah ee Lagu sameeyo Xarumaha Codbixinta

§4005(a)(6)(D), §4005(a)(10)(l)(vi)(X)

Waxaa jira noocyo badan oo wax ka bedel macquul ah oo lagu bixiyo gudaha xarumaha codbixinta. Halbeegga ugu yar ee afar ilaa siddeed aaladood oo lagu calaamadayn kara warqada codbixinta oo la heli karo, iyo wax ka beddelka muuqaaleed ayaa la heli doonaa si loo taageero codbixiyayaasha naafada ah.

Weyneeyayaasha iyo hagayaasha saxiixa ayaa diyaar ah oo si weyn loogu soo bandhigay goob kastoo laga soo galo xarumaha. Kuraasta ayaa la heli karaa haddii looga baahdo xarumaha laga soo galo iyo qaybaha cod bixinta ee la heli karo. Haddii cod-bixiyuhu u baahan yahay caawimo dheeraad ah, shaqaalaha xarunta codbixinta ayaa diyaar u ah inay caawiyaan cod-bixiyaha sidii hage muuqaal ah qolka codaynta, ama inay akhriyaan macluumaad kasta.

Wax ka beddelka kor lagu soo sheegay ka sokow, xarun kasta oo codbixineed ayaa laga sahamiyaa sida fudud ee loo isticmaali karo. Haddii loo baahdo, xarumaha waxaa la siin karaa jaranjaro marin ah oo loogu talagalay kor u kaca gaaban si qolalka loo galo, koonyada si loogu garto khataraha, iyo dermo lagu daboolo khataraha simbiirixidda. Inta badan xarumaha waxa laga codsadaa ina albaabada qolka codaynta ay u furan yihiin in la isticmaalo.

Xarun kasta oo codbixineed waxay leedahay calaamado ay ku qoran yihiin taleefoon lambar uu codbixiyuhu wici karo si uu uga codsado caawinta inuu ku codeeyo asagoo joogo meel ka baxsan xarunta codeynta isagoon soo galin xarunta codbixinta.

Codbixinta Guurguura

Xafiiska Diiwaan-hayahu wuxuu sii wadi doonaa raadinta fursadaha iyo maalgelinta si uu u keeno codbixinta guurguurta oo la siiyo codbixiyayaasha ku sugan goobo gaar ah iyo aagagga juqraafiga ah halkaas oo codbixiyayaashu haddii kale ay ku yeelan karaan helid xaddidan fursadaha codbixinta qof ahaaneed. Shaqaaluhu waxa ay baadhayaan habka ugu wanagsan ee loogu bixiyo adeegyadan sida in la tixgaliyo isticmaalka goob codbixineed nooca "pop-up" loo yaqaano ama unug guurguura oona wata qalbiisa oo dhamaystiran.

Xafiiska Diiwaangelinta ayaa si fiican u baadhay oo u kormeeray baska buska "Live Well" ee Degmada San Diego sida inay noqoto xal macquul ah, laakiin waxa ka maqan meel bannaan oo loo baahan yahay iyo awoodda koronto ee loo baahan yahay si ay u noqoto xarunta codbixinta.

Sida xafiiska Diiwaan-hayuhu u qorsheeyay wareegyada doorashada hordhaca ah iyo mida guud ee 2022, shaqaaluhu waxay xoogga saareen bixinta in ka badan tirada ugu yar goobaha xarumaha codbixinta ee 4 maalmoodka ee gobolka oo dhan si ay sida ugu wanaagsan u daboolaan baahiyaha gaarka ah ee bulshada. Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa bixiyay 26 xarumo cod bixin dheeri ah oo shaqeeya 4-maalmood inta ugu yar ee degmada looga baahan yahay. Tixgalin isku mid ah ayaa la siin doonaa wareegyada doorashada la qaban doona mustaqbalka iyadoo lagu darayo bixinta xarumaha codbixinta nooca "pop-up" ee goobaha la beegsanayo muddooyin gaaban.

Khadka Taleefanka Codbixiyaha ee Bilaashka ah

§4005(a)(10)(I)(vii)

Codbixiyayaashu waxa ay wici karaan khadka taleefoonka cod-bixiyayaasha bilaashka ah si ay su'aalo u waydiiyaan una helaan macluumaadka la xidhiidha codbixinta iyo doorashada. Lambarka taleefanka lacag la'aanta ah waa (800) 696-0136 waxaana lagu daabacay websaydka Diiwaan-hayaha waxaana lagu bixiyaa wacyi-gelinta warbaahineed iyo xiriirka tooska ah ee cod-bixiyaha oo ay ku jirto Buug-yaraha Macluumaadka Cod-bixiyaha.

Cod-bixiyayaasha dhegaha la', maqalka adag, ama hadalka naafada ka ah waxay isticmaali karaan California Relay Service (CRS) iyagoo wacaya 711 si ay u isticmaalaan nidaamka taleefanka iyagoo isticmaalaya telefoon fariimo qoraaleed ah (TTY) ama aalad kale si ay u wacaan lambarka taleefoonka codbixiyaha lacag la'aanta ah ee Xafiiska Diiwaan-hayaha Cod-bixiyaha. CRS waxay taageertaa hababka isgaarsiinta ee soo socda: TTY, VCO, 2LVCO, HCO, STS, VASTS, ASCII, ama Cod.

Shirarka Fiidiyowga

Shirarka fiidiyowga ayaa lagu heli karaa Luqadda Ishaarada Ameerikaanka (ASL) si loogu kabo adeegyada shaqsi ahaan loogu talagalay cod-bixiyayaasha dhegoolaha ah.

Adeegyada Kaalmada Luuqaddeed

Xafiiska diiwaan-hayaha codbixiyuhu wuxuu siiyaa adeegyo kaalmo luqadeed oo dhamaystiran cod-bixiyayaasha. Marka laga yimaad shaqaale laba luqale ah oo u heellan inay diyaariyaan tarjumaado ku habboon dhaqan ahaan iyo ilaalinta jadwalka dhacdooyinka ballaadhan, xafiiska Diiwaan-haya waxaa ka go'an inuu siiyo fursado badan oo bulshooyinka luqadda ah si ay wax uga bartaan modheelka xarunta codbixinta iyo doorashooyinka codbixinta.

Xafiiska diiwan-haya waxa uu leeyahay shaqaale laba luqadlayaal ah oo wakhti buuxa shaqeeya oo kormeeraya mid kasta oo ka mid ah luqadaha degmada ee uu federaalku daboolo iyo inta lagu jiro wareega doorashada gobolka oo dhan waxaanu samaynaa dadaal kasta si aanu u qorno oo aanu u shaqaaleyno shaqaale laba luuqadood xilliyeed ah mid kasta oo ka mid ah gobolka iyo luqadaha deegaanka ee degmada.

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa gaara meelo sara iyo meelo ka baxsan waxay uga baahan yahay sharciga gobolka iyo federaalka isaga oo isticmaalaya adeegga turjubaanka degmada marka ay habboon tahay.

Warqadaha Tixraaca Codbixinta La turjumay iyo Kaalmada Luuqadeed

§13400

Sida uu dhigayo Xeerka Doorashooyinka California §14201, Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa looga baahan yahay inuu bixiyo warqadaha tixraaca codbixinta tarjumaada xuduudaha la beegsaday iyo macluumaadka tilmaamaha in waraaqaha tixraaca ee la turjumay ay diyaar u yihiin xuduudaha la beegsaday. Xafiiska Diiwan-hayaha waxa uu bixiyaa tiro dhamaystiran oo waraaqo tixraac ah oo la turjumay oo loogu talagalay xuduudaha la beegsanayo ee xarun kasta oo codbixineed.

Kaadhadhka uu isticmaalo cod-bixiyaha waxa lagu bixiyaa dhammaan xarumaha codbixinta. Kaarkani waxa uu taxayaa helitaanka warqadaha tixraaca ee la turjumay iyo dhammaan adeegyada luqadda la heli karo.

Adeegyada Kaalmada Luqadeed ee ku jira Buug-yaraha Macluumaadka Cod-bixiyaha ama Tilmaamaha Cod-bixinta Boostada iyo Websaydka

§4005(a)(8)(B)

Cod-bixiyayaasha waxa la ogaysiinayaa inay awood u leeyihiin inay ku codsadaan agabka doorashada ee la turjumay iyo adeegyada kaalmada luqadeed ee ku jira Buug-yaraha Macluumaadka Cod-bixiyaha iyo tilmaamaha warqadda codbixinta.

Websaydhka diiwaan-hayaha ayaa bixiya liis dhamaystiran oo ah adeegyada kaalmada luqadeed. Macluumaad dheeri ah waxaa laga heli karaa: [Kaalmada Luuqadeed \(sdvote.com\)](https://www.sdvote.com).

Shaqaalaha Xarunta Codbixinta Laba-luqadlaha ah iyo Luuqadaha la taageero

§4005(a)(10)(I)(vi)(IX)

Xafiiska diiwaan-hayaha ayaa go'aamiya xarumaha codbixinta ee ku yaala ama ku dhagan xuduudka buuxiya shuruudaha luqadda sida hoos timaada Xeerka Xuquuqda Codbixinta ee federaalka (VRA) wixii ah Kaalma luuqadeedka qof ahaaneed. Intaa waxaa dheer, xafiiska diiwaan-hayaha wuxuu ka codsan doonaa fikradda dadweynaha ee ku saabsan xarumaha codbixinta ee ay tahay inay ka shaqeeyaan shakhsiyaad si fiican u yaqaan luqado gaar ah, iyada oo la raacayo qodob-hoosaadka (c) ee §12303 iyo §203 ee Xeerka Xuquuqda Cod-bixinta ee federaalka. Waxaa lagu dadaali doonaa in la shaqaaleysiyo oo lagu meeleeyo shaqaalaha xarunta codbixinta ee labada luuqadoodka ah xarumahan codbixinta.

Codbixiyayaashu waxay sidoo kale haystaan doorashooyin kale oo ay ku helaan caawimo luqadeed oo wax ku ool ah sida qoraallo la turjumay, iyo kaalmada turjumaanka ee lagu sameeyo wicitaanka telefoonka.

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu sii wadi doonaa wada shaqaynta uu la leeyahay bulshada si uu u helo shaqaale ku hadla afka Soomaaliga iyo Faaris ee jooga xarumaha codbixinta ee la beegsanayo taas oo ka sareysa kana baxsan waxa uu u baahan yahay sharciga gobolka iyo federaalka.

Khadka Taleefanka Codbixiyaha ee Bilaashka ah iyo Xarunta Wicista Codbixiyaha

§4005(a)(10)(I)(vii), §4005(a)(10)(I)(i)(I)

Ka hor maalinta doorashada, xafiiska diiwaan-hayaha waxa uu ka shaqeeyaa xarun wicitaan oo ay ka hawl-galaan hawl-wadeenno laba-luqadle ah oo isticmaala adeegga wacitaanka turjubaanka si uu uga caawiyo cod-bixiyayaasha (dhanka luuqada) su'aalaha ay qabaan doorashada ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib. Lambarka xarunta wicitaanka ee bilaashka ah waa (800) 696-0136.

Lambarka taleefanka lacag la'aanta ah waxaa lagu daabacay websaydka xafiiska Diiwaan-hayaha, ogeysiisyada adeegga dadweynaha, agabyada suuq-geynta, waxaana lagu bixiyaa wacyi-gelinta warbaahineed iyo xiriirka tooska ah ee cod-bixiyaha oo ay ku jirto Warqadda Macluumaadka Cod-bixiyaha. Waxaa jira hal lambar oo bilaash ah oo loogu adeego dadweynaha, oo ay ku jiraan bulshooyinka luqadaha.

Tignoolajiyada Lagu Codeeyo

Liiska Codbixiyayaasha ee Elektaroonig ah (E-pollbooks)

Pollbook-yada elektarooniga ah (e-pollbooks) waxay beddeleen liiska waraaqaha ah waxayna bixiyaan hab lagu hubinayo si hufan oona sugan uga shaqaynta cod-bixiyayaasha u qalma goob kasta oo xarunta codbixineed ah. E-pollbook-yadan waxay ka kooban yihiin liis elektaroonig ah oo cod-bixiyeyaal ah (Liiska Codbixiyayaasha) oo lagu isticmaalo xarumaha codbixinta. Liiska codbixiyayaasha waa liiska rasmiga ah ee dhammaan codbixiyayaasha diwaangashan ee u qalma inay codeeyaan doorashada. E-pollbook-yada waxa loo isticmaali karaa in lagu xaqiijiyo xogta diiwaangelinta codbixiyayaasha, oo ay ku jiraan magaca, ciwaanka, taariikhda dhalashada, luqadda la door bidayo, doorashada xisbiga, xuduudka, iyo heerka qofku ku cod-bixinaya boostada. Si kastaba ha ahaatee, e-pollbooks waligood ma kaydiyaan lambarka laysinka darawalnimada, ama tixraac kasta oo qofka geynaya lambarka sooshiyaal sekiyuuritiga. Waxay bixiyaan goobitaan ka wanaagsan iyo macluumaadka xaaladda codbixiyaha ee aad uga cusub marka loo eego liiska warqada, u abuurista khibrad codbixineed oo wanaagsan codbixiyayaasha.

E-pollbook-yada waxay ku kala beddelanayaan akhbaaraha cusub ee xaaladda codbixiyaha nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha hab la ilaaliyo, hab qarsoodi ah, kaas oo u suurtageliya shaqaalaha xarunta codbixinta inay si wanaagsan u xaqiijiyaan u-qalmitaanka codbixiyuhu si uu u helo warqadda codbixinta oo ay ka hortagaan laba jeer codeynta. Nidaamka diiwaangelintu wuxuu la wadaagaa macluumaadkaas iyada oo loo marayo xiriirka uu la leeyahay nidaamka VoteCal. VoteCal waa keydka diiwaan gelinta codbixiyayaasha oo gobolka dhan ka shaqeeya kaas oo la falgala ayna is dhaafsadaan macluumaadka dhababayska diiwaangelinta gobolka iyo nidaamyada kale ee gobolka sida Waaxda Asluubta iyo Dhaqancelinta, Waaxda Caafimaadka Dadweynaha, iyo Waaxda Gaadiidka.

Nidaamka Codeynta

Diiwaan-hayaha Cod-bixiyayaasha waxa uu raacayaa shuruudaha xidhitaanka nidaamka softweerka cod-bixinta iyo hardweerka inta lagu jiro tijaabada, shahaadaynta, iyo nidaamka hawlgalka. Iyada oo qayb ka ah hanaanka shahaadaynta, nidaamka codaynta ee Degmada San Diego waxa uu soo maray hawlo adag iyo imtixaan amni oo uu sameeyay xafiiska Xoghayaha Dawladda iyo shaybaadhka nidaamka cod bixinta ee la shahaadeeyay si loo hubiyo u hoggaansanaanta nidaamka sharciga California iyo federaalka, oo ay ku jirto California Voting System Standards (CVSS) oo ah kuwa ugu adag qaranka. Softiweerka iyo hardweerka nidaamka codaynta ee gobolka ee la aqoonsan yahay waxa lagu isticmaalaa deegaan si adag loo kontoroolo silsilada haynta iyo saxsanaanta softiweerka.

Isku halaynta waxay ku dhisan tahay dhinac kasta oo ah tignoolajiyada codbixinta ee degmada. Iyada oo qayb ka ah hanaanka xaqiijinta tignoolajiyada adag ee codbixinta, hay'ad madax banaan oo qolo saddexaad ah ayaa samaysay dib u eegista koodhka asalka iyo qiimaynta, tijaabinta amniga hardweerka iyo softiweerka, iyo tijaabada hawlgalka si loo ansixiyo waxqabadka nidaamka iyo ku shaqaynta xaaladaha caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn. Tan waxaa loo sameeyay si loo ogaado wax kasta oo nugul oo ku jira koodhka u baahan in adeeg bixiyaha nidaamka codeynta ay xalliyaan ama yareeyaan ka hor xaqiijinta si dhab ahaan looga hortago wax kasta oo khuseeya doorashooyinka degmada.

Xafiiska Diiwaan-hayaha ee silsilad adag oo shuruudaha haynta, oo ay ku jiraan shuruudaha laga rabo shaqaalaha, ayaa ka ilaaliya koodhka asalka ah in la jabsado iyo dib u eegista doorashada markuu khilaaf dhaco iyo dhawrista waxay dejiyaan u hoggaansanaanta u dhexeeya waraaqaha cod bixinta iyo nidaamka cod bixinta.

Intaa waxaa dheer, nidaamka codbixinta ee degmadu waa mid warqad ku salaysan, taasoo la micno ah in xafiiska Diiwaan-hayaha uu leeyahay raad-raac warqadeed warqad kasta oo codbixineed.

Aalada Lagu calaamadeeyo Warqada Codbixinta (BMD)

Xarun kasta oo codbixineed waxay lahaan doontaa ugu yaraan afar ilaa siddeed aaladaha leh dhalada taabashada ee warqada codbixinta lagu calaamadeeyo kuwaas oo daabici doona warqadda codbixinta rasmiga ah ee u doorbidayo cod-bixiyaha oo ay dib u eegi karaan ka hor intaan codkooda la gelin sanduuqa rasmiga ah ee codbixinta si loogu tiriyo xafiiska Diiwaan-hayaha.

Cod-bixiyayaasha goobahan booqanaya si ay shakhsi ahaan ugu dhiibtaan codkooda waxay ku calaamadayn doona codkooda iyagoo isticmaalaya aaladan. Aaladani ma kaydinayso, mana hagaajinayso, mana tirinayso wax cod ah mana kaydinayso wax macluumaad cod-bixiye ah. Aalada codbixinta kuma xidhna intarneedka iyo aaladaha kale oo ku jirta xarunta codbixinta.

Waxaa jirta sabab loogu yeero aaladaha calaamadaynta warqadah codbixinta. Cod-bixiyuhu wuxuu ku calaamadeynayaa doorashadooda shaashadda. Dabadeed, daabacaha ku xiran cod-bixiyuhu waxa uu ku daabici doonaa warqadda codbixinta rasmiga ah ee ay doorteen. Warqadan rasmiga ah ee cod bixinta waa waxa gudaha u gala sanduuqa codbixinta ee rasmiga ah ee shax ahaan loogu hagaajin doono Diiwaan-hayaha xafiiska Codbixiyaha.

Aaladaha calaamadaynta cod bixinta waxay si buuxda ugu hoggaansamaan Sharciga Naafada Maraykanka. Waxa fududeynaya isticmaalka waxaa ka mid ah shaashad gacanta lagu isticmaalayo, kontarool gacanta lagu isticmaalayo oo leh giraangiraha duuban iyo badhanka "wax lagu doorto", xulashooyinka hagaajinta cabbirka qoraalka iyo isbarbardhigga midabka shaashadda, dhaga gashiyo la bixyo oo awood u siinaya inay in lagu isticmaalo qaab maqal ah hawlaha codbixinta, oo ay la socoto hagidda maqalka si qaab aan carqalad lahayn loogu isticmaalo iyo ku calaamadaynta warqadaha codbixinta si elektarooniga ah. Intaa waxaa dheer, waxaa jira godad diyaarsan oo loogu talagalay isku xirka badhamada aaladaha taabashada ama aaladda lagu isticmaalo afka codbixinta. Ingriiska ka sokoow, codbixiyayaashu waxay ku dooran karaan warqadda cod bixinta ay turjuntay mid ka mid ah afarta luuqadood ee dawlada dhexe ee degmada: Isbaanish, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees.

Shaqaalaha xarunta codbixinta ayaa bilaabi doona fadhiga cod-bixiyaha iyaga oo hawlgalinaya aalada. Codbixiyayaashu waxay doortaan luqadda oo waxay doortaan iyaga oo taabanaya shaashadda ku xigta xulashooyinka codbixinta. Codbixiyayaashu waxay dib u eegi karaan xulashadooda oo waxay ku hagaajin karaan haddii loo baahdo shaashadda, ka dibna taabo "daabaca warqadda codbixinta" si ay u daabacaan warqadooda rasmiga ah. Markay dib u eegi ku sameeyaan xulashadooda, codbixiyayaashu waxay ku ridi karaan warqadooda gacanka sirta ah ama baqshadda la siiyay shaqaalaha xarunta codbixinta oo ku celiyaan shaqaalaha xarunta codbixinta si ay ugu ridaan sanduuqa codbixinta ee rasmiga ah.

Fiidiyowiyada tilmaamo ku siinaya ayaa laga heli karaa barta sdvote.com.

Ammaanka Codbixinta

Xafiiska Diiwaan-hayaha wuxuu si daran u raaca tillaabooyinka amniga si loo ilaaliyo hufnaanta doorashadeena isagoo fiiro gaar ah u leh arrimaha la xidhiidha sharafta codbixinta iyo nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha. In kasta oo hanjabaaduhu ay si joogto ah isu beddelaan oo ay dhacdooyinku yihiin kuwo gaar ah, haddana waxa jira hab-dhaqannada ugu wanaagsan iyo hab-maamuusyo adag oo la diyaariyey si loogu diyaargarobo hanjabaadaha iyo dhacdooyinka.

Xafiiska Diiwaanhayuhu wuxuu sii wadaa inuu horumariyo nidaamyadeena jira waqti xaadirkan iyada oo loo marayo habdhaqanada maaraynta wareegga nolosha ee hardweerka iyo softiweerka. Xafiiska diiwangelintu waxa uu hirgaliyay kontaroolada amniga muuqda iyo interneed inta ayagoo ku kordhiyay tababarida shaqaalaha.

Waxa jira kontaroolo adag oo gelitaanka goobta ah si loo sugo qolka uu nidaamka codbixintu yaalo. Qol kasta oo ka mid ah xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu leeyahay kamarado saqafka ku rakiban oo ku wajahan meelaha laga soo galo iyo meelaha laga baxo si taxadar dheeraad ah loo yeesho.

Qorshayaasha Amniga iyo kuwa Kadiska ah ee lagu Xaqiijinayo Ka Hortagga Carqaladaynta

§4005(a)(10)(I)(vi)(VIII)(ia)

Xafiiska Diiwaan-hayuhu waxa uu leeyahay habab dhinacyo badan leh si loo hubiyo ka hortagga carqaladaynta hawlaha doorashada iyada oo loo marayo iskaashi, kontaroolo gudaha ah, iyo habraacyo.

Iskaashiga Gobolka, Federaalka, iyo kuwa Deegaanka ah

Xafiiska diwaan-hayuhu waxa uu xidhiidh la sameeyay Xafiiska Tignoolajiyada ee Degmada San Diego (CTO) iyo kan hadda jira ee Information Technology Outsourcer (ITO) – kaas oo maamula shabakada IT-ga ee degmada. Xafiiska diwaan-hayaha waxa kale oo uu xidhiidh toos ah la leeyahay Xoghayaha Gobolka California, Department of Homeland Security (DHS), Federal Bureau of Investigation (FBI) iyo Guddiga Kaalmada Doorashada (EAC).

Waxaa jira korodh ku imaada wada shaqaynta wareegyada doorashada ka hor iyo ka dib doorashada. Xafiiska diwaan-hayaha waxa uu wanaajiyaa wacyiga iyo xidhiidhka amniga, oo ay ku jiraan kulamo joogto ah oo kala yeesho Degmada CTO, ITO, Sheriff, DHS, iyo FBI.

Kontoroolada Gudaha

Marka laga eego dhinaca farsamada, xafiiska Diiwan-hayaha waxa ku jira habab dhinacyo badan leh si loo hubiyo in xogta ay sii ahaato mid sir ah lana sugo mar walba. Ammaanka muuqaaleed sidoo kale waa tixgelin marka la dooranayo goobta lagu qabanayo xarunta codbixinta. Kaliya xarumaha bixiya amni muuqaaleed oo ku filan ayaa la dooran doonaa.

Maareynta aaladda mobaylka ahi waxay ogolaataa guud ahaan kantaroolka sugidda iyo fulinta siyaasadaha la xiriira tabletyada e-pollbook. Maareynta aaladda moobaylka ahi waxay u oggolaaneysaa awoodda si fogaan arag ah lagu tirtiri karo aaladda, isticmaal xoojinta baasweerka, iyo u oggolaanta cusboonaysiinta softiweerka haddii loo baahdo.

Xarun kasta oo codbixineed waxay yeelan doontaa taleefan casri ah oo loogu talagalay ogeysiinta haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Shaqaalaha xarunta codbixinta waxay helayaan tabobar iyo tilmaamo ku qoran buuggooda tababarka kuna saabsan hababka la raacayo haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Qalabka codaynta ayaa lahaan doona baytari kayd ah haddii ay dhacdo in korontadu tagto.

Habraacyada, Hababka iyo Heerarka

Habraacyada silsiladda haynta ayaa loo adeegsadaa xakamaynta maamul ahaan taas oo qayb ka ah istaraatiijiyadda guud ee lagu sugayo hawlaha doorashada. Habraacyada silsiladda haynta waxay hubisaa in la socodka jireed ee qalabka nidaamka cod bixinta uu jiro.

Alaabaha nidaamka cod bixinta waxa lagu xafidayaa meel ammaan ah ilaa inta la geynayo goobta doorashada. Aaladaha lagu calaamadeeyo codbixinta waxa lagu ridayaa weel gaadiid oo tiro ahaan xidhan. Dhammaan qalabka cod bixinta waxaa lagula socdaa sumadaha RFID marka la geeyo oo lagu soo celiyo xafiiska Diiwaan-hayaha.

Shaqaalaha doorashadu waxay saxiixaan dukumeentiyada silsilada haynta, oo loo yaqaan diiwaanka xaqiijinta shaabadda, ee qalabka codaynta ee goobaha qaybinta. Shaqaalaha doorashada iyo shaqaalaha xarunta codbixinta waxaa looga baahan yahay inay hubiyaan shaabadda amniga si ay u soo sheegaan wixii shaabado jaban ama dhaqdhaqaaqyo laga shakiyo. Qalabka cod bixinta waa la kaydiyaa waxaana la dhigayaa meel sugan.

Qorshayaasha Amniga iyo kuwa Kadiska ah ee lagu Xaqiijinayo Sii Socodka Doorashada Haddii ay dhacdo Carqalad §4005(a)(10)(I)(vi)(VIII)(ib)

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu leeyahay qorshe hawleed joogto ah oo la dejinayo si loo yareeyo ama looga hortago carqaladaynta hannaanka doorashada; si kastaba ha ahaatee, waxaa sidoo kale muhiim ah in loo diyaar garoobo ka jawaabista suurtagalnimada dhabta ah ee dhacdo ama carqaladayn. Qaybtani waxa ay qeexaysaa tillaabooyinka la qaadayo si loogu diyaargarooobo in la sii wado hawlaha doorashada haddii ay carqaladi timaado.

Jawaabta Xarunta Codbixinta Inta lagu jiro Muddada Cod bixinta

Inta lagu jiro muddada cod bixinta, shaqaalaha bixiya taageerada doorashadu waxay ku sugan yihiin degmada San Diego oo dhan, waxayna diyaarna u yihiin inay ka jawaabaan dhacdo kasta. Shaqaalahan goobta ku sugani waxay haystaan qalabkii iyo saadadka codbixinta ee beddelka ah waxaana loo tababaray inay wax ka qabtaan arrimaha farsamada. Shaqaalaha xarunta codbixinta waxay leeyihiin macluumaadka xiriirka degdega ah, oo ay ku jiraan miiska caawinta

ee u go'an oo si dhakhso ah u xallin kara arrimaha, ama ugu soo diri kara xubin ka tirsan kooxda taageerada goobta.

Dhammaan qalabka xarunta codbixinta waxay u shaqeeyaan si madaxbannaan. Haddii hal qayb oo ka mid qalabka uu joojiyo shaqadiisa, saamayn kuma yeelanayso hawlgalka qalabka kale ee cod bixinta.

Qorshaha Sii wadida Hawlaha

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu leeyahay qorshe qoto-dheer oo loo isticmaali karo haddii ay dhacdo in weerar dhanka internet-ka ah ama uu go'o. Qorshahani waxa uu bixiyaa hab qaabeysan oo lagu garto, waxna looga qabto dibna looga so kabsado dhacdada.

Hawlaha muhiimka ah iyo ku tiirsanaanta tignoolajiyada xogeed ee la xidhiidha ayaa la aqoonsaday si loo xaqiijiyo hawlgallada doorashooyinka socda haddii ay dhacdo carqalad. Waxay bixisaa qaab lagu go'aaminayo hananada ganacsiga muhiimka ah iyo awood u siinta ururka inuu ka badbaado luminta qayb ama dhammaan awoodaha hawlgelinta.

Wufuudda maamulka ayaa loo diyaariyay inay ka fogaadaan macluumaadka khaldan oo ay maareeyaan u baahinta macluumaadka cod-bixiyayaasha, shaqaalaha, iyo warbaahinta inta lagu jiro carqaladaynta, iyo sidoo kale inay sameeyaan go'aanno siyaasadeed iyo go'aanno ku saabsan qaybaha shaqada ee waaxda sida ku habboon.

Hababka iyo Heerarka

§4005(a)(10)(I)(iv)

Ujeedada qorshaha sii wadida waa in loo ogolaado in hawlaha doorashadu ay sii socdaan haddii ay dhacdo musiibo, dhacdo, ama carqaladayn adeeg. Iyadoo la aqoonsanayo habraacyada hawlaha lagama maarmaanka ah, hababka, isgaarsiinada, iyo tas-hiilaadka kale, inta badan carqaladaha la arki karo ee hawlaha doorashooyinka waa la yarayn karaa.

Hawlaha Muhiimka ah

Qorshaha sii wadista waxa uu tilmaamayaa dhammaan hawlaha muhiimka ah ee loo baahan yahay si loo wado doorashada. Mid kasta oo ka mid ah hawlaha muhiimka ah waa la falanqeeyay, waxaana la go'aamiyaa ku tiirsanaanta farsamada mid kasta. Mid kasta oo ka mid ah ku tiirsanaanta farsamada, istaraatiijiyad soo kabashada ayaa lagu qeexay, oo ay ku jirto soo celinta xogta loo baahan yahay.

Xiriirada

Qorshaha sii wadida waxa kale oo uu wax ka qabtaa hababka loo wada xidhiidho, iyo sida xidhiidhku u sii socon karo inta lagu jiro carqalada. Tan waxaa ku jira habab kale oo isgaarsiineed haddii ay dhacdo in nidaamka aasaasiga ahi inuu guuldareysto. Mas'uuliyadaha ayaa loo xilsaaray baahinta macluumaadka, iyo daneeyayaasha muhiimka ah kuwaas oo looga baahan doono inay la xiriiraan haddii ay dhacdo carqalad. Hanaanka uu ku imaaday carqaladu

wuxuu go'aamiyaa cidda ay u baahan tahay in lala xidhiidho. Tusaale ahaan, carqaladaha qaarkood waxay u baahan doonaan in lala xiriiro kaliya shaqaalaha xarunta codbixinta, halka carqaladaha kale ay u baahan karaan in lala xiriiro warbaahinta iyo dadweynaha.

Xarumaha Kale

Xarumo kale ayaa loo qoondeeyay masiibooyinka ka dhaca deegaanka, sida dabka, daadadka, ama xaaladaha kale ee aan oggolaanayn in la galo xarumaheena muhiimka ah.

Xarumaha codbixinta ee ay saamaysay musiibo ama korontada oo iska tagta, hawlaha cod bixinta waxaa loo rari karaa qayb kale oo xarunta ah. Aaladaha lagu calaamadeeyo warqadaha codbixinta iyo E-pollbooks waxay leeyihiin baytari kayd ah waxaana loo rari karaa dibadda si ku meel gaar ah loogu isticmaalo haddii waqti gaaban la isticmaali waayo gudaha xarunta. Haddii hawlaha cod-bixintu ay sii socon kari waayaan, markaa meelaha u dhow waa lala xidhiidhi doonaa cod-bixiyayaashuna waxa la siin doonaa hagitaan ku saabsan halka la aadayo. Calaamadaha waxa lagu dhejin doonaa goob kasta oo la saameeyay waxaana macluumaadka la xidhiidha raritaanku lagu faafin doonaa xarumaha warbaahinta maxaliga ah.

Saamaynta Maaliyadda

Qiyaasta Kaydinta Muddada-gaaban iyo tan Muddada-dheer

§4005(a)(10)(I)(v)

Shaxahan soo socdaa waxa ay muujinayaan kala dhigdhigida kharashaadka iyo kaydka halka mar ah iyo kan joogtada ah ee la xidhiidha qabashada doorashooyinka sida waafaqsan Xeerka Doorashada Codbixiyaha. Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu maalgeliyey nidaamkiisa cod-bixinta, waxa uu qaan-gaadh ka dhigay hab-socodkiisa, waxana uu kordhiyey awoodiisa sannadaha si uu u maareeyo tiro badan oo cod-bixiyeyaal ah oo door bidaaya in ay ku codeeyaan boostada oo si fiican u maareeyo ka shaqaynta waraaqaha codbixinta boostada si sax ah oona ammaan ah.

Sanad maaliyadeedku wuxuu soconayaa 1da Luulyo ilaa Juunyo 30 ee sanadka soo socda.					
Kharashaadka Qalabka	FY 2019-20 <i>Luulyo 1, 2019 - Juun 30, 2020</i>	FY 2020-21 <i>Luulyo 1, 2020 - Juun 30, 2021</i>	FY 2021-22 <i>Luulyo 1, 2021 - Juun 30, 2022</i>	FY 2022-23 <i>Luulyo 1, 2022 - Juun 30, 2023</i>	FY 2023-24* <i>Luulyo 1, 2023 - Juun 30, 2024</i>
Nidaamka Cusub ee Codaynta	\$13,176,841		\$512,063	\$512,063	\$512,063
Liiska Codbixiyayaasha ee Elektaroonig ah (e-pollbooks)	\$243,740	\$1,870,488		\$272,303	\$280,000
Qalabka Shabakadda		\$932,259			
Soo saaraha Warqada Codbixinta Boostada	\$61,231	\$301,084			\$60,000
Sanduuqyada Codbixinta Rasmiga ah				\$480,284	\$259,717
WADARTA QIIMAHA QALABKA	\$13,481,812	\$3,103,831	\$512,063	\$1,264,650	\$1,111,780

**Miisaaniyad la soo jeediyay*

	QIIMAHA	KAYD
Lacagaha Shaqaallaha Cod-bixinta (Moodheelka Codbixinta Dhaqameed)		\$1,150,000
Lacagaha Goobta Cod-bixinta (Moodheelka Codbixinta Dhaqameed)		\$90,000
Galinta Internetka Fiilo la'aanta ah (Xarumaha Codaynta)	\$36,000	
Qalabka La soo kiraysto (Xarumaha Codaynta)	\$65,000	
Qalabka La soo kiraysto/Ijaartay (Xarumaha Codaynta)	\$200,000	
Shaqaalaha Doorashada (Xarumaha Codaynta)	\$4,000,000	
Wacyigelinta Cod-bixiyayaasha Dheeraadka ah & Barnaamij Waxbarasho oo hoos timaada VCA	\$1,900,000	
WADARTA GUUD	\$6,201,000	\$1,240,000

Natiijada u gudubka Xeerka Doorashada Codbixiyaha, Degmada San Diego waxay rajaynaysaa in ay aragto kaydka ah in aanay siinaynin ku dhawaad 10,000 oo shaqaale codbixineed gunno ay ku shaqeeyaan Maalinta Doorashada. Si kastaba ha ahaatee, kharashyada joogtada ayaa la filayaa natiijada bixinta internetka lagu xidho e-pollbooks (Liiska Codbixiyayaasha) iyo laptop-yada si loogu isticmaalo dhammaan xarumaha codbixinta. Shaqaalaha goobta doorashada waxaa la siiyaa dhowr maalmood oo shaqo ah maadaama xarumaha codbixinta la furay maalmood badan. Intaa waxaa dheer, waxaa jira kharashyo dheeraad ah oo la xidhiidha ka shaqaynta goobaha codbixinta maalmood badan, iyo kharashyo dheeraad ah oo ku saabsan wacyigelinta codbixiyayaasha iyo waxbarashada iyada oo la raacayo shuruudaha VCA.

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu sii wadi doonaa in uu falanqeeyo saamaynta Xeerka Doorashada Codbixiyuhu ee kharashaadka muddada dheer iyo kaydka la xidhiidha qabashada doorashooyinka sida uu qabo moodheelkan.

Dulmarka Qorshaha Waxbarashada Cod-bixiyayaasha iyo Wacyigelinta

§4005(a)(10)(I)(i), §4005(a)(10)(I)(i)(VI)

Gundhig

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu leeyahay barnaamij waxbarasho iyo wacyigelin codbixiye oo adag oo leh shan shaqaale waqti buuxa ah oo ay weheliyaan 18 ilaa 20 shaqaale xilliyeed oo dheeraad ah inta lagu jiro wareegyada doorashada. Isku-duwayaasheena wacyigelinta waxay xidhiidh adag oo wanaagsan la leeyihiin hogaamiyayaasha bulshada iyo daneeyayaasha. Waxaa naga go'an inaan abuurno iskaashi cusub oo lala yeesho ururada bulshada, iyo sidoo kale xoojinta cilaaqaadka aan la leenahay shuraakada bulshada.

Waxay ahayd mid adag intii lagu jiray cudurkii safmarka laakiin taariikh ahaan waxaanu ka qayb qaadanay in ka badan 300 oo dhacdooyin iyo shirar bulsho ah sannad kasta. Intii lagu jiray 2020 iyo 2021 in badan oo ka mid ah shaqadan ayaa lagu qabtay onlayn iyadoo COVID-19 uu weli soo socdo waxaan sii wadnay adeegsiga aaladda onlaynka sida ku habboon wareegyada doorashadii 2022.

Hirgelinta VCA-da iyo ka hor doorashooyinka hordhaca ahaa iyo kuwa guud ee 2022, waxaanu qabanay 14 shirar wadatashi dadweyne, 71 aqoon-is-weydaarsiyo waxbarasho cod-bixiyeyaal ah, waxaana ka qayb-galnay 424 xafladood iyo shirar bulsho.

Xafiiska Diiwan-hayaha wuxuu si guul leh uga faa'iideystey hawlihiisa ka qayb qaadashada codbixiyayaasha iyo bandhigga laga helay qabashada doorashooyinka Nofeembar 2020 iyo Sebtembar 2021 ee gobolka oo dhan iyadoo la raacayo moodheelka "Xarunta Codbixinta". Ololaha wacyi-gelinta ee dhammaystiran ee la xidhiidha doorashooyinkan waxa ay taageereen dedaalladeena inta lagu jiro wareegyada doorashada 2022.

Wareegga Doorashada Guud ee Madaxweynaha Nofeembar 2020 "VCA-u eg":

Intii lagu jiray wareegga doorashada ee Nofeembar 2020 xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu laba waraaqood oo toos ah u diray dhammaan cod-bixiyayaasha diiwaangashan isagoo ku wargelinaya isbeddellada soo socda ee doorashada iyo ikhtiyaarkooda cod-bixinta. Waxaanu dhignay 165 xayaysiis joornaal ah oo dhan 43 wargeys oo kala duwan oo ku yaala Degmada San Diego, oo ay ku jiraan wargeysyo ku qoran afaf badan.

Waxaan wadnaa ku dhawaad 450 xayaysiis maqal ah oo dhan 12 idaacadood oo kala duwan, oo ay ku jiraan idhaacada ku boxo luqado badan, iyo xayaysiisyo dheeri ah oo la sii daayo.

Marka laga reebo xayaysiis dhaqameed iyo mida dhijitaalka ah, xafiiska diwaangeliyaha ayaa si istiraatiiji ah u isticmaalay boorar waaweyn oo dibadda ah oo ku yaala gidaarada bannaanka ee kaalmaha shidaalka, dukaamada ku habboon, iyo bakhaarada khamriga ee ku yaal xaafadaha aan lahayn matalaada buuxda. Wadar ahaan, waxaanu dhignay boodhadh ku dhawaad 45 goobood oo kala duwan oo ku yaala Degmada San Diego. Waxaanu samaynay afar nashqadood oo boodhadh ah, boodhadh kasta waxa ku jiray fariimo Ingiriisi waxaana ku jira luuqad ka tarjumaysa xaafadda gaarka ah. Xeeladdani waxay u oggolaanaysaa xafiiska Diiwaan-hayaha inuu bar-tilmaameedsado xaafadaha aan noocyada kale ee warbaahin dhaqameedku had iyo jeer aysan gaadhi karin.

Warbaahinta dhijitaalka dheeraadka ah waxaa ka mid ahaa shan iimaylada dadka badan loo diro, xayaysiisyada soo fuula ablikeeshinada la isticmaalo, Facebook, Instagram, iyo xayaysiisyada Twitter-ka ee lala beegsaday suuqa guud, luqadaha federaalku daboosho, iyo bulshooyinka midabka leh. Waxaan sidoo kale horumarinay oo sii deynay 30 Ogeysiis Adeegga Dadweynaha oo lagu heli karo shan luqadood.

Ololahani waxa uu keenay in ka badan 90 milyan oo aragtiyood.

Wareegga Doorashada Ku celinta Badhasaabka Sebtembar 2021 “VCA-u eg”:

Inta lagu jiro Sebtembar 2021 doorashadii ku celinta ahayd, waxaanu dhignay 35 xayaysiis joornaal ah oo dhan 28 wargeys oo kala duwan oo ku yaala Degmada San Diego, oo ay ku jiraan wargeysyo ku qoran afaf badan. Waxaan galinay xayaysiimaha maqal ah 12 idaacadaha iyo idaacadaha kala duwan, oo ay ku jiraan xarumo-luqadeed waxaanan ku wadnay ku dhawaad 1500 xayaysiis raadiyihii dhaqameedka.

Marka laga soo tago xayeysiiskii dhaqameed iyo midkan dhijitaalka ah, xafiiska diiwan-hayaha ayaa mar kale ka faa'iidaystay boodhadhka waaweyn ee lagu dhajiyo darbiyada bannaanka xaafadaha aan sida buuxda loogu adeegin ee ku salaysan xulashada zip koodh la beegsaday. Waxaan u ogaanay in tani ay tahay xeelad guuleysatay 2020. Wadar ahaan, waxaanu ku dhajinay boodhadh ku dhawaad 65 goobood oo kala duwan guud ahaan Degmada San Diego.

Warbaahinta dhijitaalka dheeraadka ah waxaa ka mid ahaa laba iimaylada dadka badan loo diro, xayaysiisyada soo fuula ablikeeshinada la isticmaalo, xayaysiinada Facebook iyo Twitter, markale lala beegsaday suuqeenada guud, iyo bulshooyinka midabka leh.

Ololahani waxa uu keenay in ka badan 57 milyan oo aragtiyood.

Labada ololeba waxay ku wargeliyeen cod-bixiyayaasha Degmada San Diego ikhtiyaarkooda codbixineed ee waafaqsan Xeerka Doorashada Cod-bixiyaha, oo ay ku jiraan in dhammaan cod-bixiyayaasha firfircoon ee diiwaangashan ay si otomaatiga u heli doonaan warqadda codbixinta boostada ku dhawaad bil ka hor Maalinta Doorashada, codbixiyayaashu waxay ku soo celin karaan warqaddooda boostada, ama goob kasta oo leh sanduuqa lagu rido warqada codbixinta ama goobta codaynta, iyo codaynta qof ahaaned ayaa laga heli karaa maalmo badan mid kasta oo ka mid ah 200+ goobood oo gobolka oo dhan ah.

Labadan doorasho ee ka dhacay gobolka oo dhan ayaa degmada San Diego siisay faa'iido aad u weyn maadaama aan hadda si rasmi ah ugu gudubnay Xeerka Doorashada Codbixiyaha. Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu hore ugu dheeraaday dedaalka uu ugu jiro diyaarinta codbixiyayaasha wixii isbeddel ah ee ay ku heli karaan doorashada soo socota. Dadaalka 2022-ka ee wacyigelinta iyo ololaha warbaahinta ayaa sii waday xoojinta doorashooyinka codbixinta iyo in hadda isbeddelladan cod-bixiyayaashu ay horeba khibrad ugu leeyihiin dhammaan doorashooyinka mustaqbalka.

Wareegyada Doorashada Badhasaabka ee 2022:

Taageerada waxbarashada iyo wacyigelinta codbixiyayaasha inta lagu jiro Juun 2022 doorashooyinka hordhaca ahayd iyo Nofeembar 2022 doorashadii guud, waxaanu dhignay 175 xayaysiis joornaal ah oo dhan 29 wargeys oo kala duwan oo ku yaala Degmada San Diego, oo ay ku jiraan wargeysyo ku qoran afaf badan. Waxaan galinay xayaysiimaha maqal ah 12 idaacadaha iyo

idaacadaha kala duwan, oo ay ku jiraan xarumo-luqadeed waxaan ku wadnay ku dhawaad 1,896 xayaysiis raadiyihii dhaqameedka.

Si aan dadweynaha ugu wargelino dookhyadooda codbixinta, waxaanu samaynay oo aanu sii daynnay 10 Ogeysiis Adeegga Dadweynaha (nuqulo soconaya 15 iyo 30 ilbiriqsi). Fiidyowiyada waxaa lagu soo saaray luqadaha ay federaalku bixiso waxaana ku jiray qormooyin caawinaya dadka aan waxba maqlin.

Warbaahinta dhijitaalka dheeraadka ah waxaa ka mid ahaa sagaal iimaylada dadka badan loo diro, xayaysiisyada soo fuula ablikeeshinada la isticmaalo, xayaysiinta muuqaalo onlayn ah, xayaysiin laga soo daayo TV-ga lagu xidhan yahay Facebook, Instagram, iyo xayaysiisyada Twitter-ka ee lala beegsaday suuqa guud, luqadaha federaalku daboosho, iyo bulshooyinka midabka leh.

Marka laga soo tago isticmaalka boodhadhka waaweyn dibada ee lagu dhijayo darbiyada kaalmaha shidaalka, dukaamada ku habboon, makhaayadaha, iyo bodegas, xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa ballaariyey dadaallada xayaysiisyada bannaanka si loogu daro boodhadhka meelaha ay istaagaan gaadiidka iyo boodhadhka xayaysiinta ee waaweyn. Xayaysiisyada lagu dhajiyo bannaanka ayaa si istiraatiiji ah loogu dhajiyay xaafadaha aan sida buuxda loogu adeegin oo ku saleysan xulashooyinka zip koodhyo la beegsaday. Wadar ahaan, waxaan ku dhajinay xayaysiisyada bannaanka 247 goobood oo kala duwan oo ku yaala Degmada San Diego.

Ololayaasha waxa uu keenay in ka badan 154.2 milyan oo aragtiyood.

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu sii wadi doonaa ka qayb-qaadashada dhacdooyinka wacyigelinta ee taariikh ahaan laga soo qayb-galay, iyo sidoo kale horumarinta habab hal-abuur leh oo waxtar leh oo lagula xidhiidho cod-bixiyayaasha. Qorshahan Waxbarashada iyo Wacyigelinta Cod-bixiyayaasha ayaa iftiimin doona dhacdooyinka wacyigelinta ee xafiiska Diiwaan-hayaha isku dubaridi doono iyo/ama ka soo qaybgali doono, qeexi doona xeeladaha fariimaha ee kordhin doona dhax joogitaankeena bulshada, oo tafaasiil ka bixin doona sida kheyraadka loogu qoondayn doono si hufan iyada oo loo marayo falanqaynta dhibcaha xogta muhiimka ah.

Soo-koobidda Yoolalka

- Aqoon-is-weydaarsiyo/mudaaharaadyo waxbarashada cod-bixiyayaasha
- Bandhigyada bulshada ee xarunta codbixinta
- Dhacdooyinka ka-qaybgalka bulshada
- Iskaashi lala yeesho kulliyadaha iyo jaamacadaha
- Iskaashiga lala yeesho dugsiyada sare
- 2 - 4 xiriir codbixiyeyaal toos ah
- Olole luuqado badan oo adag oo warbaahineed oo la beegsaday
- Joogitaanka baraha bulshada oo kordhay
- Ka dhigo xafiiska Diiwaan-hayaha inuu yahay isha rasmiga ah ee macluumaadka doorashada ee lagu kalsoon yahay

Shuraakada Bulshada

§4005(a)(10)(I)(i)(III)

Si guul leh u joogteynta barnaamijka wacyigelinta bulshada waxaa ka mid ah sii wadida iskaashiga lala aasaasay kooxaha iyo ururada bulshada. Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu sii

joogto ah ula kulmaa shaqsiyaad gaar ah oo ka socda ururo kala duwan oo ka kala socda Degmada San Diego oo ay ku jiraan kooxaha u doodista, kooxaha madaniga ah, ururada muwaadiniinta, xarumaha dadka waayeelka, kaniisadaha, karraaniyada magaalada, xisbiyada siyaasada, iyo shaqsiyaadka kale. La-hawlgalayaasha bulshada waxay ku taxan yihiin bogga 70 ee lifaaqyada.

[Voter Accessibility Advisory Committee iyo Language Accessibility Advisory Committees §4005\(a\)\(9\)\(A\), §4005\(a\)\(9\)\(B\), §4005\(a\)\(10\)\(I\)\(i\)\(I\)](#)

Voter Accessibility Advisory Committee (VAAC) iyo Language Accessibility Advisory Committee (LAAC) oo ay weheliso diwaan-hayaha ayaa loo qoondeeyay inay diiradda saaraan baahiyaha cod-bixiyayaasha naafada ah iyo bulshooyinka ku hadla luqadaha laga tirada badan yahay.

Hadafka LAAC waa in uu la taliyo uuna ka caawiyo xafiiska Diiwaan-hayaha hirgelinta sharciyada federaalka iyo gobolka ee la xidhiidha helitaanka hanaanka doorashada ee cod-bixiyayaasha leh aqoonta Ingiriisi xaddidan.

LAAC waxa kale oo ay bixisaa talooyinka aqoonsiga iyo kala hormarinta hawlaha iyo barnaamijyada si loo hubiyo in si siman loo helo warqadda cod bixinta. Mas'uuliyadaha guddiga waxaa ka mid ah bixinta khibrada arrimaha helitaanka luqadda; bixinta talooyinka aqoonsiga iyo kala hormarinta hawlaha; iyo ka jawaabista su'aalaha xafiiska ee ku saabsan taageerada luqadda.

Hadafka VAAC waa in ay la taliso oo ay ka caawiso xafiiska Diiwaan-hayaha siinta adeegyada cod-bixiyayaasha leh baahiyaha la heli karo iyo in ay sahamiyaan dhammaan fursadaha lagu bixiyo helitaanka loo siman yahay ee warqadda cod bixinta.

VAAC waxa kale oo ay bixisaa talooyinka aqoonsiga iyo kala hormarinta hawlaha iyo barnaamijyada si loo hubiyo in codbixiyayaasha naafada ah inay si madaxbanaan u dhiiban karaan warqaddooda codbixinta. Mas'uuliyadaha guddiga waxaa ka mid ah bixinta khibrada arrimaha isticmaalka sahlan; ku darista habraacyada si fudud u isticmaalida hawlaha; iyo siinta jawaab-celinta xafiiska Diiwaan-hayaha ee ku saabsan heerarka isticmaalka iyo wacyigelinta cod-bixiyayaasha naafada ah.

Ajendaha kulanka VAAC iyo liiska xubnaha iyo ururada taageera koox kasta waxa laga heli karaa bilowga bogga 85 ee lifaaqyada. La-hawlgalayaasha bulshada luqadda iyo la-hawlgalayaasha bulshada ee dadka naafada ah waxay ku taxan yihiin bogga 88 ee lifaaqyada.

[Aqoon-is-weydaarsiyada Waxbarashada Cod-bixiyaha ee Bulshooyinka Luqada §4005\(a\)\(10\)\(I\)\(i\)\(VI\)\(ia\)](#)

Ka dib daabacaaddii ugu dambaysay ee EAP bishii Maarso 2022, xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa martigeliyay aqoon-is-weydaarsiyo waxbarashada codbixiyayaasha ee gobolka oo dhan si loo bixiyo xarunta codbixinta iyo macluumaadka doorashada mid kasta oo ka mid ah luqadaha looga baahan yahay degmada San Diego ee federaalka iyo gobolka. Luqadaha federaalku ay bixiso waxaa ka mid ah Isbaanish, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees. Luqadaha uu gobalku bixiyo waxaa ka mid ah Carabi, Jabbaan, Kuuriyaan, iyo Laotiyaan.

Xafiiska Diiwan-hayaha ayaa gaara meelo sara iyo meelo ka baxsan isagoo bixinaya aqoon-is-weydaarsiyo lagu beegsanayo bulshooyinka Soomaalida iyo Faariska ee Degmada San Diego.

Aqoon-is-weydaarsi kasta waxa ku jiray macluumaad ku saabsan moodheelka xarunta codbixinta, dulmar/soo bandhiga qalabka cod-bixinta, adeegyada kaalmada luqadda, doorashada meelaha la geeyso warqada codbixinta, iyo hababka lagu codsado agabka doorashada oo la turjumay. Macluumaadka ku saabsan aqoon-is-weydaarsiyada waxay ku qoran yihiin bogga Diiwaan-hayaha waxaana lala wadaagaa LAAC iyo ururada bulshada ee luqadaha.

Aqoon-is-weydaarsiyada ayaa sii socon doona in la qabto ka hor doorasho kasta. Aqoon-is-weydaarsiyada iyo dhacdooyinka soo socda ayaa laga heli karaa halkan [Jadwalka Bulshada \(sdvote.com\)](http://Jadwalka Bulshada (sdvote.com)).

Hababka Lagu Aqoonsado Bulshooyinka Luuqada

§4005(a)(10)(I)(i)(V)

Xafiiska Diiwan-hayaha waxa uu isticmaalaa tirada codbixiyayaasha ee ku codsada kaalmada luqadeed foomamka diiwaangelinta codbixiyayaasha. Codbixiyayaashu waxa kale oo ay ku ogeysiin karaan xafiiska Diiwaan-hayaha doorashada luqaddooda telefoonka, fakiska, iimaylka ama onlayn si ay u cusboonaysiiyaan doorashadooda luqadda. Ilaha sida United States Census Bureau ayaa gacan ka geysta aqoonsiga meelaha laga yaabo inay jiraan bulshooyin leh aqoon Ingiriisi xaddidan oo laga yaabo inay u baahdaan kaalmada luqadda.

Intaa waxaa dheer, xafiiska diiwangeliyaha waxa uu talo ka helaa shuraakada bulshada ee isku luuqada ah ee ku saabsan qaybinta juqraafiga ee meelaha bulshooyinka isku luqadda ah ay ka jiraan Degmada San Diego.

Khadka Taleefanka Codbixiyaha ee Bilaashka ah iyo Kaalmada Luuqaddeed

§4005(a)(10)(I)(vii), §4005(a)(10)(I)(i)(I)

Ka hor maalinta doorashada, xafiiska diwaan-hayaha waxa uu ka shaqeeyaa xarun wicitaan oo ay ka hawl-galaan hawl-wadeenno laba-luqadle ah oo isticmaala adeegga wacitaanka turjubaanka si uu uga caawiyo cod-bixiyayaasha (dhanka luuqada ama kuwa naafada ah) su'aalaha ay qabaan doorashada ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib. Lambarka xarunta wicitaanka ee bilaashka ah waa (800) 696-0136.

Lambarka taleefanka lacag la'aanta ah waxaa lagu daabacay websaydka xafiiska Diiwaan-hayaha, ogeysiisyada adeegga dadweynaha, agabyada suuq-geynta, waxaana lagu bixiyaa wacyi-gelinta warbaahineed iyo xiriirka tooska ah ee cod-bixiyaha oo ay ku jirto Warqadda Macluumaadka Cod-bixiyaha. Waxaa jira hal lambar oo bilaash ah oo loogu adeego dadweynaha, oo ay ku jiraan bulshooyinka luqadaha.

Cod-bixiyayaasha dhegaha la', maqalka adag, ama hadalka naafada ka ah waxay isticmaali karaan California Relay Service (CRS) iyagoo wacaya 711 si ay u isticmaalaan nidaamka taleefanka iyagoo isticmaalaya telefoon fariimo qoraaleed ah (TTY) ama aalado kale si ay u wacaan Khadka Taleefanka Codbixiyaha Bilaashka ah ee Diiwaan-hayaha. CRS waxay taageertaa hababka isgaarsiinta ee soo socda: TTY, VCO, 2LVCO, HCO, STS, VASTS, ASCII, ama Cod.

Aqoon-is-weydaarsiga Waxbarashada Cod-bixiyaha ee Bulshada Naafada ah §4005(a)(10)(I)(i)(VI)(ib)

Ka dib daabacaaddii u dambaysay ee EAP, xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa martigeliyay aqoon-is-weydaarsiyo waxbarasho oo la siiyo cod-bixiyayaasha si loo kordhiyo si fudud u isticmaalida iyo ka-qaybgalka cod-bixiyayaasha naafada ah ee u qalma. Aqoon-is-weydaarsiyadu waxaa ka mid ahaa waxbarasho ku saabsan moodheelka xarunta codbixinta, dulmar/soo bandhigyada qalabka cod-bixinta, helidda qalabka cod-bixinta, macluumaadka sanduuqa lagu rido warqada cod-bixinta, iyo fursadaha lagu heli karo warqada codbixinta boostada oo si fudud loo isticmaali karo.

Macluumaadka ku saabsan aqoon-is-weydaarsiyada waxay ku qoran yihiin bogga Diiwaan-hayaha waxaana lala wadaagaa VAAC iyo ururada bulshada ee dadka naafada ah.

Aqoon-is-weydaarsiyada ayaa sii socon doona in la qabto ka hor doorasho kasta. Aqoon-is-weydaarsiyada iyo dhacdooyinka soo socda ayaa laga heli karaa halkan [Jadwalka Bulshada \(sdvote.com\)](https://sdvote.com).

Wacyigelinta Si fogaan arag ah ugu Codeynta adigoo isticmaalaya Boostada §4005(a)(10)(I)(i)(II)

Xafiiska Diiwaangelinta ayaa hirgeliyay qorshe wacyigelin ah oo lagu wargelinayo codbixiyayaasha helitaanka RAVBM wuxuuna sii wadi doonaa la shaqaynta VAAC si loo qiimeeyo xeeladaha kala duwan ee lagu kordhinayo wacyiga iyo ka qaybgalka dadka naafada ah. Saadadka waxbarasho ee ku saabsan xulashada RAVBM waxa lagu daraa xidhmada warqadda codbixinta, buug-yaraha macluumaadka cod-bixiyaha, iyo macluumaadka soo diraha doorashooyinka codbixinta la siiyay dhammaan cod-bixiyayaasha firfircoon ee diiwaangashan inta lagu jiro wareegga doorashada.

Sanadkii 2022, waxaa jiray 4,564 codbixiye kuwaas oo codeeyay iyaga oo isticmaalaya xalka RAVBM ee Diiwaan-hayaha.

Dugsiyada Sare

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa xiriir adag la sameeyay dugsiyada sare ee deegaanka iyada oo loo marayo Barnaamijkeeda Codbixinta Ardayga ee hoos timaada moodhelkii hore ee doorashada halka maalin ahayd. Barnaamijku wuxuu u oggolaaday ardaydu inay ka qaybqaataan shaqaale codbixin ahaan maalinta doorashada oo ay ka helaan khibrad gacan ku leh hanaanka dimuqraadiyadda. Waxaan hadda dib u soo celinaynaa barnaamijkan shaqaalaha doorshada ardayda ee halka maalin ah kaas oo lagu dhex dari doono moodheelka doorashada maalmaha badan ee hadda jira.

Intaa waxaa dheer, xafiiska diiwaan-gelintu wuxuu sii wadi doonaa inuu ka faa'iidaysto xiriirka hadda jira ee uu la leeyahay dugsiyada sare si uu u bixiyo fursadaha is-diiwaangelinta goorta hore ah, tababarka diiwaangelinta codbixiyayaasha, iyo macluumaadka ku saabsan sida doorashooyinka loogu qabto moodheelka xarunta codbixinta.

Kulliyadaha iyo Jaamacadaha

Degmada San Diego waxaa ka jira in ka badan labaatan kulliyadood iyo jaamacadood. Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu xidhiidh la sameeyey kulliyado iyo jaamacado badan iyada oo loo marayo martigelinta goobaha cod bixinta iyo boostada goobaha sanduuqa cod bixinta, iyo sidoo kale taageeridda dadaallada waxbarashada codbixiyayaasha iyo tababbarka diiwaangelinta codbixiyayaasha ee ururada ardayda.

Xafiiska diiwangeliyaha wuxuu sii wadaa dadaalkiisa qorsheynta ee kulliyadaha iyo jaamacadaha si uu u martigeliyo xarun codbixinta ama goobaha uu yaalo sanduuqa lagu rido warqada codbixinta boostada ee kambaaska. Goobaha sanduuqa cod bixinta ee kambaasyada kulliyada ayaa ka kordhi doona seddex goobood, University of California San Diego, San Diego State University, iyo California State University San Marcos si loo gaaro yoolka ah bixinta sanduuqyada lagu rido ugu yaraan afar kambaas kulliyadeed oo dheeri ah.

Xarumaha Xabsiga, Xilliga kormeerka danbiilaha, iyo Dadka lag soo dhaayay xabsiga

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu xidhiidh la sameeyay xarumaha xabsiga ee degmada, iyo waaxda asluubta si ay u bixiso tababbarka diiwaangelinta codbixiyayaasha, macluumaadka doorashada, sheekooyinka wararka, warqadaha xogta ku qoran tahay iyo boodhadhka, akhbaaraadka cusub, waxaan diyaar u nahay in aanu ka jawaabno su'aalaha shaqaalaha sida ay u caawinayaan codbixiyayaasha sanadka oo dhan.

Waxa kale oo aanu isku dubbaridaynaa helida diwaangelinta codbixiyayaasha, qaybinta warqadaha codbixinta oo ay ku jiraan diiwaangelinta codbixiyayaasha shuruudaysan, iyo soo celinta warqadaha codbixinta ee xarun kasta ay dad ku xiran yihiin oona ku taala gobolka.

Waxaan siinaa tababar tabaruc ah ururo dibada ka yimid kuwaas oo ay diyaarisay waaxda Sheriff si ay uga diiwaan geliyaan shaqsiyaadka xarumaha xabsiga degmada.

Waxaan sii wadi doonaa inaan la shaqeyno ururada bulshada iyo u qareemada si aan u aqoonsano sida aan u taageeri karno dadaallada lagu ogeysiinayo kuwa ku jira ilaalada ama kuwa la soo daayay oona dib u helay xuquuqdooda isdiwaangelinta iyo codeynta.

Xafiiska Diiwan-hayaha waxa uu soo saaray boodhadh ay ku qoran yihiin fariimo nidaamsan oo loogu talagalay xafiisyada ilaalada iyo sii deynta maxbuusta iyo bulshooyinka lagu taliyey ee Koonfur-bari San Diego, National City, City Heights, Barrio Logan, iyo North County.

Ka Qaybgalka Codbixiyayaasha iyo Dhacdooyinka Bulshada

Ka qayb qaadashada dhacdooyinka degmada San Diego oo dhan waa qayb muhiim ah oo ka mid ah barnaamijka wacyigelinta codbixiyayaasha ee Diiwaan-hayaha. Iyada oo daboolaysa aag kala duwan oo ballaadhan, dadaalladan ayaa ujeeddadoodu tahay in la gaaro yoolalka soo socda:

- Bar codbixiyayaasha moodheelka xarunta codbixinta iyo doorashooyinka codbixinta
- Bixi macluumaad oo u oggolaataa xafiiska Diiwaan-hayaha inuu isku diiwaangeliyaan ayna codeeyaan
- Badi gaadhtaada oo raadi fursadaha iskaashiga

Maaddaama kooxo badan ay ka jiraan gudaha Degmada San Diego, ka qaybqaadashada dhacdooyinka bulshada waxay u ogolaataa xafiiska Diiwaan-hayaha inuu horumariyo adeegyada, dhiso iskaashiga, iyo la macaamilka bulshooyinka kala duwan. Kooxaha la beegsaday ayaa lagu daray, laakiin kuma xaddidnayn, kuwan soo socda:

- Kooxaha bulshada
- Kaniisadaha
- Dabaqada dhalashada
- Kooxaha isku luuqada ah
- Naadiyaasha Rotary
- Dugsiyada Sare
- Jaamacadaha
- Ururada xirfadleyda
- Ururada ardayda
- Wakaaladaha adeegga dawlada
- Naadiyada dhaqameed
- Ururada aan macaash doonka ahayn
- Kooxaha dhalinyarada
- Ururada bixiya adeega
- Xarumaha muwaadiniinta waayeelka ah

Dhacdooyin Bulsho

Si loo joogteeyo ka dhax muuqashada bulshada, xafiiska diiwaan-haya waxa uu sii wadi doonaa in uu diirada saaro dadaalkiisa wacyi galinta bulshada ee dhacdooyinka yar ilaa tan dhex-dhexaadka ah iyo kuwa waaweyn. Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa goobjoog ka noqon doona dhacdooyinkan si loo diiwaan geliyo codbixiyaasha xaqa u leh iyo inuu bixiyo macluumaadka ku saabsan moodheelka xarunta codbixinta, doorashooyinka codbixinta, iyo macluumaadka kale ee doorashada. Shaqaaluhu waxay la falgali doonaan dadweynaha, ka jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna ka caawin doonaan buuxinta foomamka diiwaangelinta codbixiyayaasha.

Ka qaybqaadashada dhacdooyinkan, xafiiska diiwaan-hayaha wuxuu marin u yeelan doonaa kumanaan qof oo ka tirsan bulshooyinka degmada San Diego. Liiska dhacdooyinka bulshada ee suurtoogalka ah ee la daba-joogo ayaa laga heli karaa bogga 55 ee lifaaqyada.

Qorshaha Warbaahinta Guud

§4005(a)(10)(I)(i)(I)

Si loo ogeysiyo cod-bixiyayaasha Degmada San Diego ee doorashadooda codbixinta, xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa qaadi doona hab ballaaran si uu u gaaro codbixiyaasha ugu badan ee suurtoogalka ah, marar badan.

Xeeladaha xayeysiinta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, warbaahinta bulshada, ku diritaanka boostada, daabacaadda, baahinta, fiidiyoow onlayn ah, dhijitaal, boodhadhka dibadda, boodhadhka lagu dhajiyo aagaga gaadiidka, boodhadhka xayeysiiska waaweyn, baahinta maqalka, iyo raadiyaha. Hadafka Diiwaan-hayaha waa in uu buuxiyo baaxadda warbaahinta ee cod-bixiyayaasha si loo kordhiyo awoodda cod-bixiyuhu si uu u arko agabka loogu talagalay xog ahaan iyo suuq-geynta.

Marka laga soo tago gaaritaanka suuqa guud, ololaha warbaahintu waxa uu soo bandhigi doonaa xayaysiisyada ku qoran luqadda ay ku hadlaan bulshada degan si loo gaaro bulshooyinka, meelaha codbixiyayaasha aysan si fiican u imaanin, dadka aan si fiican loo adeegin, iyo kuwo kale.

Wada-hawlgalayaasha warbaahinta

§4005(a)(10)(I)(i)(II), §4005(a)(10)(I)(i)(VIII)

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa bixin doona sheekooyinka wararka, fiidyowga, iyo macluumaadka warbaahinta bulshada ee qaybinta iyo daabacaadda wada-hawlgalayaasha warbaahinta jira oo raadiyo ilo kale oo warbaahineed oo lagu kalsoon yahay si ay xogta u gudbiyaan. Ikhtiyaarada sida fudud loo heli karo, hababka lagu codsado warqada cod bixinta ee la heli karo, xarunta codbixinta iyo goobaha sanduuqa cod bixinta, macluumaadka kale ee doorashada guud iyo wararka kale ee codaynta ayaa lala wadaagi doonaa asxaabta warbaahinta. Wixii ah liiska wada-hawlgalayaasha warbaahinta, fadlan eeg bogga 75 ee lifaaqyada.

Sheekooyinka wararka waxaa lagu soo daabici doonaa [Xarunta Wararka Degmada](#) taasoo macluumaadka u dhigi doonta mid waqtigeeda lagu helo oo muhiim ah. Sheekooyinka lagu soo dhejiyo Xarunta Wararka Degmada waxaa la wadaaga oo loo sii gudbiyaa dadweynaha iyada oo loo marayo warbaahinta maxalliga ah. Dhammaan sheekooyinka waxaa lagu turjumay Isbaanishka, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees waxaana loo diraa warbaahinta luqadda ku habboon.

Intaa waxa dheer, Diiwaan-hayuhu inta badan waxa uu ka soo muuqdaa warbaahinta maxaliga ah si uu u bixiyo xog cusub oo la xidhiidha doorashada.

Shuraakada Warbaahinta Luuqadda

§4005(a)(10)(I)(i)(I)

Bulshooyinka kala duwan ee Degmada San Diego waxay ka helayaan wararka iyo macluumaadka ilo kala duwan, oo ay ku jiraan noocyada warbaahinta luqadda. Xafiiska Diiwan-hayaha waxaa jooga shaqaale waqti-buuxa ah oo heelan si ay ugu adeegaan sidii isku xirka

bulshooyinka luqadda oo ay xiriir adag la yeesheen la-hawlgalayaasha warbaahinta luqadda ee bulshooyinka ku hadla Isbaanishka, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees. Macluumaadka doorashooyinka soo socda iyo khadka taleefoonka caawinta codbixiyayaasha ee lacag-la'aanta ah waxaa lala wadaagaa la-hawlgalayaasha warbaahinta luqadda. Wixii ah liiska wada-hawlgalayaasha warbaahinta luqadda, fadlan eeg bogga 76 ee lifaaqyada.

Xiriirada Tooska ah ee Cod-bixiyayaasha

§4005(a)(10)(I)(i)(X)

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu soo diraa fariimo toos ah doorasho kasta si uu u ogaysiiyo dhammaan codbixiyayaasha firfircoon ee diwaangashan helitaanka khadka telefoonka ee caawimada codbixiyayaasha ee bilaashka ah iyo siinta macluumaadka ku saabsan doorashada iyo doorashadooda cod bixinta. Galka wax lagu soo diro ayaa laga yaabaa inay ku kala duwanaadaan cabbirkooda laakiin waxaa loo qaabayn doonaa inay soo jiitaan dareenka cod-bixiyaha iyadoo la adeegsanayo astaanta ganacsi iyo farriimaha Diiwaan-hayaha Cod-bixiyayaasha iyo Degmada. Galka wax lagu soo diro ayaa laga yaabaa inay sidoo kale bixiyaan macluumaadka sida kala doorashooyinka codbixinta, xarunta codbixinta iyo goobaha sanduuqa lagu rido warqada codbixinta iyo saacadaha, iyo goorta la filayo in la helo buug-yaraha macluumaadka codbixiyaha ama xirmada rasmiga ah ee warqadda codbixinta.

Galka wax lagu soo diro kasta waxaa loo tarjumi doonaa mid kasta oo ka mid ah luqadaha gobolka ee ay bixiso federaalka. Nooca Ingiriisiga ee galka wax lagu soo diro waxaa ku jiri doona fariin ku qoran mid kasta oo ka mid ah luqadaha degmada oo ay bixiso federaalka oo sharraxaysa sida cod-bixiyuhu ku heli karo galka wax lagu diro ama agabka kale ee doorashada luqad kale ah.

Afarta waraaqood ee ugu horreeya waxay soo bixi doontaa qiyaastii 99 maalmood ka hor Maalinta Doorashada (E-99) iyadoo soo dirista ugu dambaysa ay soo baxayso wax yar ka hor furitaanka xarumaha codbixinta (ku dhawaad E-22). Marka laga soo tago waraaqaha boostada lagu soo diro ee aan kor ku soo xusnay, fariimaha la beegsanayo ayaa sidoo kale lagu dari doonaa buug-yaraha macluumaadka codbixiyaha ee degmada oo ka bilaabaneyso E-40 iyo baqshadda rasmiga ah ee warqadda codbixinta ee ka baxaysa E-29.

Tusaalaha galka wax lagu soo diro ee kowaad waxa laga heli karaa boggaga 128-132 ee lifaaqyada.

Kaadhka Boostada Lacagteed horey loo bixiyay ee lagu Codsado Walxaha ku qoran Luuqad kale ama qaab si fudud loo heli karo

§4005(a)(8)(B)(iii)

Dhammaan cod-bixiyayaasha diwaangashan waxay heli doonaan kaadhka boostada ee lacagteed horay loo bixiyay ee buug-yaraha Macluumaadka Cod-bixiyaha si ay u codsadaan warqadda codaynta qaab si fudud loo heli karo iyo inay ku codsadaan walxaha doorashada oo ku qoran luqado kale sida §14201 ee Xeerka Doorashooyinka California iyo §203 ee Xeerka Xuquuqda Cod-bixinta ee federaalka. Tilmaamaha waxaa lagu dari doonaa buug-yaraha iyo websaydka Diiwaan-hayaha si loo dhammaystiro loona soo celiyo kaarka boostada.

Ogeysiisyada Adeegga Dadweynaha

§4005(a)(10)(I)(i)(VIII), §4005(a)(10)(I)(i)(IX)

Xafiiska Diiwaan-hayaha waxa uu abuuray PSA-yo maqal iyo muuqaal leh kuna kala duwan dhererka iyo mawduucyada si loo ogeysiyo codbixiyayaasha doorashooyinka soo socda (oo

lagu turjumay dhammaan luqadaha ay bixiso federaalka). Nuxurku waa wargelin iyo sidoo kale tilmaamo sida ogeysiinta cod-bixiyayaasha doorashada soo socda iyo ikhtiyaarrada cod-bixinta. Fiidiyowiyada iyo maqalka ayaa kor u qaadaya khadka taleefanka codbixiyayaasha sida fudud loo heli karo ee bilaashka si ay su'aalo u waydiiyaan una helaan macluumaadka la xidhiidha codbixinta iyo doorashada.

Fiidiyowiyadu waa kuwo qoraalo ay hoos ku soo qormayaan oona la heli karo si ay u noqdaan kuwo ay ku jiraan codbixiyayaasha maqalka adag ama dhegaha la' iyo codbixiyayaasha indhoolaha ama aragga naafada ah. Intaa waxaa dheer, fiidiyowiyada waxaa lagu duubi doonaa maqal ah Isbaanish, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees. Nuxurka waxa la siin doonaa wada-hawlgalayaasha warbaahinta guud iyo wada-hawlgalayaasha warbaahinta luqadda. Fadlan ka eeg bogga 75 ee Lifaagyada liiska wada-hawlgalayaasha warbaahinta guud iyo bogga 76 ee wada-hawlgalayaasha warbaahinta luqadda.

Baraha bulshada

Xafiiska Diiwaan-hayaha wuxuu isticmaalaa warbaahinta bulshada si uu u soo jiito codbixiyeyaal cusub iyo inuu siiyo macluumaadka codbixiyayaasha jira waqti xaadirkan ee ku saabsan moodheelka xarunta codbixinta, waqtiyada kama dambaysta ah ee muhiimka ah, doorashooyinka codbixinta iyo talooyinka, xarumaha codbixinta iyo goobaha sanduuqa lagu rido warqadaha cod bixinta.

Xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa isticmaala Facebook, Instagram, Twitter, iyo Nextdoor si kor loogu qaado xogta xarunta codbixinta iyo luqadaha bartilmaameedka ah (Ingiriisi, Isbaanish, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees) iyo dadweynaha ku nool Degmada San Diego sida Afrikaanka Maraykan ah, Hindida Maraykanka ah, Hisbaanik/Latino, Filibiin, Fiyatnaamiis, iyo Shiinees.

Hoos waxaa ah xeeladaha warbaahinta bulshada si loo gaaro yoolalka guud ee wargelinta iyo wacyigelinta codbixiyayaasha ee ku saabsan qaabka moodheelka codbixinta iyo doorashadooda codbixinta:

- Qoraalada la kafaalo qaaday ee shabakadaha warbaahinta bulshada ee lagu bartilmaameedsado isticmaalayaasha iyadoo lagu saleynayo goobta, tirakoobka dadka, danaha isticmaalaha, habdhaqanada, iyo dookhyada isticmaalaha
- Samee jadwalka warbaahinta bulshada ee bilaha kaas oo wadaaga macluumaadka doorashada muhiimka ah oo ay ku jiraan waqtiyada kama dambaysta ah, doorashooyinka cod bixinta, iyo in ka badan
- Waxay ka dhigaysaa xafiiska Diiwaan-hayaha inuu yahay ilaha rasmiga ah ee macluumaadka doorashada ee Degmada San Diego iyadoo la wadaagayo macluumaadka muhiimka ah ee doorashada, kala dhigdhigida hanaanka cod bixinta, bixinta faahfaahinta amniga doorashada, meesha ka saaraysa macluumaadka khaldan ee doorashada, iyo ka jawaabista su'aalaha ugu badan ee cod-bixiyaha waydiiyo
- Abuuraaa nuxuro soo jiidasho leh oo ay ku jiraan garaafyo iyo muuqaallo si aad codbixiyayaashu ugu mashquulaan oo loola socodsiiyo

Boodhadhka banaanka, Hooyada gaadiidka iyo boodhadhka waaweyn ee xayaysiinada

Marka lagu daro xayaysiisyada dhaqanka iyo kuwa dhijitaalka ah, Xafiiska Diiwaan-hayaha wuxuu si xeeladaysan u isticmaalaa boodhadhka waaweyn ee xaafadaha iyo boodhadhka dibadda ee waaweyn ee xarumaha shidaalka, dukaamada cabitaanada, dukaamada raashinka, dukaamada khamriga, makhaayadaha, iyo bakhaarada khamriga iyo sidoo kale xayaysiisyada hoyga gaadiidka ee ku yaal xaafad ay adagtahay in la gaaro oona ku salaysan xulashada zip

koodhka la beegsaday iyo aalada khariidaynta Center for Inclusive Democracy. Bandhig kastaa waxuu ku qoran yahay Ingiriisi iyo luuqad ka tarjumaysa xaafadda gaarka loogu talagalay.

Xeeladdahani waxay u oggolaanaysaa xafiiska Diiwaan-hayaha inuu bar-tilmaameedsado xaafadaha aan noocyada kale ee warbaahin dhaqameedku had iyo jeer aysan gaadhi karin.

Wixii ah muunad hore ee goobaha boodhadhka waaweyn ah fadlan eeg bogga 77 ee lifaaqyada. Dhammaan goobaha waxay ku xiran yihiin helitaanka.

Websayd

§4005(a)(10)(I)(i)(IV)

Websaydka Diiwaan-hayaha, sdvote.com ayaa si weyn looga faa'iidaystaa sida isha ugu weyn ee macluumaadka doorashada iyo agabyada dadweynaha. Macluumaadka ku qoran websaydka ayaa ah qaabab si fudud loo isticmaali karo oo si guud ayaa loo heli karaa. Tan waxaa ka mid ah EAP, hababka lagu codsado warqadda cod bixinta ee la heli karo, awoodda isticmaalka aaladda calaamadaynta warqada codbixinta ee la heli karo iyo sida loo isticmaalo, liisaska xarumaha codbixinta iyo meelaha uu yaalo sanduuqa lagu rido warqadaha cod bixinta, iyo macluumaadka kale ee la xiriira VCA.

Walxaha ku jira websaydka ayaa sidoo kale loo turjumay luqadaha uu Diiwaan-hayaha federaalku bixiyo si codbixiyaasha leh aqoonta Ingiriisi xaddidan ee luqadahaan ay u heli karaan macluumaadka doorashada ee muhiimka ah. Waxa jira shan nooc oo gaar ah oo ah websaydka Diiwaan-hayaha si loogu habeeyo afarta luqadood ee federaalka looga baahan yahay. Aalada turjumaada Google ayaa sidoo kale lagu bixiyaa websaydka si uu isla markiiba ugu turjumo websaydka in ka badan 100 luqadood oo kale.

Miisaaniyadda Wacyigelinta Cod-bixiyayaasha §4005(a)(10)(I)(i)(VII), §4005(a)(10)(I)(i)(VII)

U gudubka moodheelka xarunta codbixinta ayaa ah isbeddel aasaasi ah oo loogu talagalay cod-bixiyayaasha Degmada San Diego waxayna u baahan doontaa maaliyad weyn oo loogu talagalay dhinacyada badan ee Waxbarashada Cod-bixiyayaasha iyo Qorshaha Wacyigelinta illaa wareegga doorashada 2024.

Maalgelinta Waxbarashada Cod-bixiyayaasha iyo Wacyigelinta iyo Isbarbardhigga Miisaaniyadihii hore

Sanad maaliyadeedku wuxuu soconayaa 1da Luulyo ilaa Juunyo 30 ee sanadka soo socda.							
	FY 2019-20	FY 2020-21	FY 2021-22			*FY 2022-23	**FY 2023-24
Howsha	<i>Doorashada Madaxweynaha ee Hordhaca ah</i>	<i>Doorashada Madaxweynaha ee Guud</i>	<i>Doorashada Ku celinta Badhasaabka</i>	<i>Golaha Degmada 80aad ee Doorashada Hordhaca ah eena Gaarka ah</i>	<i>Doorashada Hordhaca ah ee Badhasaabka</i>	<i>Doorashada Guud ee Badhasaabka</i>	<i>Doorashada Madaxweynaha ee Hordhaca ah</i>
Xayeysiinta (baraha bulshada, daabacaadda, baahinta, fiidiyoow, dhijitaal, boodhadhka dibadda lagu dhajiyo, maqal iyo raadiyaha)	\$34,500	\$703,115	\$650,000		\$647,893	\$187,724	\$650,000
Toos ugu soo dirida boostada (u dirista dhammaan cod-bixiyayaasha diiwaangashan)	\$562,664	\$964,061	\$347,000	\$183,744	\$1,466,343	\$1,973,953	\$2,184,235
Xayeysiiska Sharci ee Wargeyska (marka lagu daro xayaysiimaha kor ku xusan)	\$84,238	\$62,174	\$45,945	\$1,000	\$9,510	\$13,446	\$50,000
Xayeysiis Kala Duwan (ololaha iyo maamulka iibsashada xayaysiiska, naqshadaynta, farshaxanimada, iyo samaynta fiidyow)	\$15,552	\$251,493			\$178,821	\$48,506	\$250,000
Hawlgallada Wacyigelinta Kala duwan (fududaynta, turjubaanada, iyo adeegyada turjumaada)					\$132,822	\$204,847	\$190,000
Wacyigelinta Codbixiyayaasha & Barnaamijka Waxbarashada (kharashaadka barnaamijka & shaqaalaha)	\$1,015,173	\$1,087,491	\$422,580	\$105,645	\$739,514	\$1,202,279	\$1,242,086
	<i>Qiimaha dhabta ah</i>	<i>Qiimaha dhabta ah</i>	<i>Qiimaha dhabta ah</i>	<i>Qiimaha dhabta ah</i>	<i>Qiimaha dhabta ah</i>	<i>Qiimaha dhabta ah</i>	<i>Miisaaniyad</i>
WADARTA MIISAANIYADA (WACYIGELINTA IYO WAXBARASHADA)	\$1,712,127	\$3,068,334	\$4,930,817		\$3,630,755	\$4,566,321	

*FY 2022-23: Lacagaha laga soo leexiyay xayaysiinta lagu kordhinayay wacyigelinta codbixiyayaasha iyo baahiyaha barnaamijka waxbarashada.
**FY 2023-24: Miisaaniyada ayaa loo kala wareejin karaa hawlaha iyadoo lagu salaynayo baahida jirta.

Lifaaqyada

Kulamada Dadweyne

Horumarinta EAP, xafiiska Diiwaan-hayaha ayaa si fiican u martigeliyay in ka badan tirada ugu yar ee shirarka dadweynaha ee Degmada San Diego si fikrado looga soo ururiyo dadweynaha. Kulamadani waxay siiyeen ka qaybgalayaasha fursad ay ku bartaan wax ku saabsan u gudubka degmada moodheelka xarunta codbixinta oo ayna bixiyaan jawaab celin.

Si loogu daro bulshooyinka la beegsanayo, kaalmada luqadda ayaa lagu bixin jiray shirar la xushay waxaana shirar gaar ah lagu dalacsiiyay bulshada naafada ah. Kulamo dadweyne oo dheeri ah oo ka sareysa kana baxsan waxa uu u baahan yahay sharciga gobolka iyo kan federaalka ayaa loo qabtay bulshooyinka Mareykanka u dhashay iyo kuwa Soomaalida ah.

Bulshooyinka la beegsado	Tirada Kulamada
Bulshada Naafada ah	4
Dadka waayeelka ah	1
Hisbaanik/Laatiin	5
Fiyatnaamiis	5
Shiineys	5
Filipino	6
Japanese	3
Korean	3
Carabi	4
Laotian	1
Bulshooyinka Dheeraadka ah	Tirada Kulamada
Qof Maraykan u dhashay	2
Somali	1

Jadwalka Kulan Dadweyne

Jadwalka dhamaystiran ee shirarka dadweynaha inta lagu jiro horumarinta EAP ayaa qaybta hoose lagu bixiyaa.

Taariikhda iyo Saacada	Luuqad	Bulshada Diirada La Saarayo	Qof ahaan mise Onlayn?	Ciwaanka Goobaha
12/9/2021 6 PM ilaa 8 PM	Ingiriisi/Fiyatnaamiis	Fiyatnaamiis	Labaduba	Mira Mesa Rec Center: 8575 New Salem St, San Diego
12/10/2021 5 PM ilaa 7 PM	Ingiriisi	Qof Maraykan u dhashay	Qof ahaan	Alpine County Library: 1752 Alpine Blvd. Alpine
12/10/2021 5:30 PM ilaa 8 PM	Ingiriisi/Filipino	Filipino	Labaduba	Registrar of Voter's office: 5600 Overland Avenue, San Diego
12/14/2021 5 PM ilaa 7 PM	Ingiriisi	Qof Maraykan u dhashay	Qof ahaan	Valley Center County Library: 29200 Cole Grade Road, Valley Center
12/14/2021 6 PM ilaa 8 PM	Ingiriisi/Isbaanish	Hisbaanik/Laatiin	Labaduba	Chula Vista Public Library Civic Center: 365 F St, Chula Vista
12/15/2021 1 PM ilaa 3 PM	Ingiriisi/Shiineys	Shiineys	Labaduba	4S Ranch San Diego County Library Branch: 10433 Reserve Dr., San Diego
12/15/2021 5 PM ilaa 7 PM	Ingiriisi/Filipino	Filipino	Labaduba	Oceanside Public Library Mission Branch: 3861 Mission Ave, Oceanside
12/16/2021 6 PM ilaa 8 PM	Ingiriisi	Guud (isku dubariday NAACP)	Onlayn	
Diseembar 18, 2021 10 AM ilaa 12 PM	Ingiriisi/Fiyatnaamiis	Fiyatnaamiis	Labaduba	Wesley United Methodist: 5380 El Cajon Blvd, San Diego
Diseembar 18, 2021 2 PM ilaa 4 PM	Ingiriisi/Filipino	Filipino	Labaduba	Skyline Hills Library 7900 Paradise Valley Road, San Diego
1/4/2022 6 PM ilaa 8 PM	Ingiriisi/Isbaanish	Hisbaanik/Laatiin	Labaduba	Skyline Hills Library 7900 Paradise Valley Road, San Diego
1/5/2022 11 AM ilaa 1 PM	Ingiriisi/Shiineys	Shiineys	Labaduba	Mira Mesa Chinese Baptist Church: 3317 Clairemont Mesa Blvd, San Diego
1/5/2022 5:30 PM ilaa 7:30 PM	Ingiriisi	Guud (isku dubariday Xarunta)	Onlayn	
1/6/2022 5 PM ilaa 7 PM	Ingiriis/Carabi	Carabi	Qof ahaan	El Cajon Branch Library: 201 E Douglas Ave, El Cajon
Janaayo 11, 2022 10 AM ilaa 12 PM	Ingiriisi	Muwaadiniinta Waayeelka iyo Bulshada Naafada ah	Onlayn	
2/26/2022 1 PM ilaa 3 PM	Ingiriis/Somali	Somali (isku dubariday PANA)	Qof ahaan	Colina Park 4085 52 nd Street, San Diego
1/24/2022 5:30 PM ilaa 7:30 PM	Ingiriis, ASL, Isbaanish, Filipino, Fiyatnaamiis, Shiineys, Carabi, Japanese, Korean, iyo Laotian	Dadka Naafada ah iyo Bulshooyinka Isku luuqada ku hadla ee Gobalka/Federaalka	Onlayn	
1/28/2022 5:30 PM ilaa 7:30 PM	Ingiriis, ASL, Isbaanish, Filipino, Fiyatnaamiis, Shiineys, Carabi, Japanese, iyo Korean	Dadweynaha Guud, Dadka Naafada ah iyo Bulshooyinka Federaalka/Dawlada ee Isku luuqada ku hadla	Onlayn	Onlayn maadaamu uu jifo kororka kiisaska COVID-19
2/3/22 5:30 PM ilaa 7:30 PM	Ingiriis, ASL, Isbaanish, Filipino, Fiyatnaamiis, Shiineys, Carabi, Japanese, iyo Korean	Dadweynaha Guud, Dadka Naafada ah iyo Bulshooyinka Federaalka/Dawlada ee Isku luuqada ku hadla	Labaduba	County Administration Center: 1600 Pacific Hwy, San Diego

Dhacdooyin Bulsho

Liistada hoose waxay muujinaysaa dhacdooyinka bulshada la beegsaday ee xafiiska Diiwaan-hayaha ka qayb galay 2021 iyo 2022.

Ballan qaadka Bulshada & Dhacdooyinka Oktoobar 20, 2021 - Disembar 2022

<u>Taariikhda</u>	<u>Magaca Dhacdada</u>	<u>Magaalada</u>	<u>Ururka Qabanaya</u>
Oktoobar 21, 2021	Shirka Caafimaadka Koonfurta Hindiya	Alpine	Southern Indian Health/Viejas
Nufeembar 3, 2021	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink
Nufeembar 13, 2021	Ride the Point 2021	San Diego	Point Loma Rotary Club
Nufeembar 18, 2021	94th Aero Squadron Social	San Diego	Decentralized Autonomous Organization (DAO)
Diseembar 1, 2021	Dabaaldegga Kirismaska	San Diego	Chinese School of San Diego
Diseembar 1, 2021	Caafimaadka Bulshada bilaha ah	San Diego	Health and Resource Fair
Diseembar 18, 2021	Christmas Pow Wow by the Sea	Imperial Beach	Soaring Eagles
Janaayo 21, 2022	Ka-qaybgalka iyo Wacyigelinta Cod-bixiyayaasha	Virtual	Asian Solidarity Coalition ASC & Partnership for the Advancement of New American
Janaayo 28 – 30, 2022	SD Lunar New Year Tet Festival	City Heights	Little Saigon San Diego
Febraayo 2, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Febraayo 4 – 6, 2022	Dabaaldega Tet	Mira Mesa	Vietnamese American Youth Alliance
Febraayo 8, 2022	Miiska diwaan galinta codbixiyayaasha ee SDSU/SOS	San Diego	SDSU
Febraayo 12, 2022	Xaflada Jacaylka	City Heights	SD Park & Rec
Febraayo 12, 2022	Ka Diiwaangelinta Cod-bixiyaha Hall of Chula Vista Community Congregational Church	Chula Vista	Community Congregational Church of Chula Vista
Febraayo 20, 2022	Chinese New Year Lawn Program	Balboa Park	House of China
Maarso 2, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Maarso 18, 2022	Soo Bandhigida Waxbarashada Cod-bixiyaha VCA oo ay la socoto Tusida Aalada Calaamadaynta warqadda Codbixinta	Valley Center	Valley Center Kiwanis Club
Maarso 27, 2022	Dhacdada Diiwaangelinta Cod-bixiyaha iyo Waxbarashada Waabka - Wacyigelinta Qunsuliyadda Philippine ee Oceanside Library	Oceanside	Council of Philippine American Organization (COPAO) and Filipino American Cultural Organization (FACO)

Ballan qaadka Bulshada & Dhacdooyinka Oktoobar 20, 2021 - Disembar 2022

Abril 1, 2022	El Cajon Business District Car Show	El Cajon	El Cajon Business District
Abril 1, 2022	SDSU Pow Wow	San Diego	SDSU Native American Student Alliance
Abril 1, 2022	Linda Vista Multi-Cultural Fair & Parade	Linda Vista	Linda Vista Multi-Cultural Fair Inc.
Abril 1, 2022	Todobaadyada Diiwangelinta Codbixiyayaasha Dugsiga Sare	San Diego	San Diego County School Districts
Abril 4, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Abril 18, 2022	Todobaadyada Diiwangelinta Codbixiyayaasha Dugsiga Sare, Tusida Aalada Calaamadaynta Codbixinta	La Jolla	La Jolla Country Day
Abril 18, 2022	Todobaadyada Diiwangelinta Codbixiyayaasha Dugsiga Sare, Tusida Aalada Calaamadaynta Codbixinta	San Diego	Crawford High School
Abril 22, 2022	Todobaadyada Diiwangelinta Codbixiyayaasha Dugsiga Sare	San Dieguito Union High School District	Canyon Crest High
Abril 21, 2022	Dhacdada HIRE Minds Job Fair Employer - Goobta Diiwaangelinta Cod- bixiyayaasha	San Diego	Mission Valley Branch Library and San Diego Workforce Partnership
Abril 21, 2022	Veterans of Foreign Wars SABLE Post 2275 - Voter Outreach Booth	El Cajon	Veteran Village and San Diego Blood Bank
Abril 24, 2022	Earth Fair	San Diego	EarthWorks
Abril 24, 2022	Earth Fair 2022 - Waabka Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha	Balboa Park	Earth Works
Meey 1, 2022	Bandhiga Dhaqameed Aasiyaanka	Mira Mesa	Silk Road Production
Meey 1, 2022	D6 Night Market	Mira Mesa	Alliance for Quality Education
Meey 4, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Meey 8, 2022	2022 Fo Guang Shan Hsi Fang Temple Celebration of Buddha's Birthday and Monther's Day	San Diego	Hsi Fang Temple
Meey 10 - 13, 2022	Wacyigelinta Codbixiyaha & Bandhiga/Diiwaangelinta Waxbarashada ee VCA	City Heights	SD Library
Meey 12, 2022	Wacyigelinta Codbixiyayaasha iyo Diiwaangelinta Dugsiga Sare	Chula Vista	Bonita Vista High School and League of Women Voters
Meey 14, 2022	D6 Neighborhood Fair - horaan loo yaqaanay D6 Night Market	Mira Mesa	Alliance for Quality Education- D6 Neighborhood Fair
Meey 16 - 18, 2022	Wacyigelinta Codbixiyaha & Bandhiga/Diiwaangelinta Waxbarashada ee VCA	Linda Vista	SD Library

Ballan qaadka Bulshada & Dhacdooyinka Oktoobar 20, 2021 - Disembar 2022

Meeey 19, 2022	Todobaadka Diiwangelinta Codbixiyayaasha Dugsiga Sare	Escondido	Escondido Charter High School
Meeey 19 - 21, 2022	Wacyigelinta Codbixiyaha & Bandhiga/Diiwaangelinta Waxbarashada ee VCA	Mira Mesa	SD Library
Juun 1, 2022	San Diego County Fair	Del Mar	San Diego County Fair
Juun 1, 2022	San Diego Night Market	San Diego	San Diego Night Market
Juun 1, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Juun 4, 2022	House of China Annual Presentation of Essay Competition & Celebration of Dragon Boat Fest	San Diego	House of China
Juun 12, 2022	Sanad Guurada 124aad ee Maalinta Xornimada Filibiin	Balboa Park	House of the Philippines (HOP) & Cavite Association of Southern California Inc. (CASCI)
Juun 19, 2022	Dhacdada Juneteenth & Friends 2022	La Mesa	La Mesa Juneteenth & Friends
Juun 20, 2022	Dhacdada HIRE Minds Job Fair Employer - Goobta Diiwaangelinta Cod- bixiyayaasha	San Diego	Mission Valley Branch Library and San Diego Workforce Partnership
Luulyo 1, 2022	Pride Festival (Bandhiga Qaniisyada)	San Diego	San Diego Pride
Luulyo 6, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Luulyo 15, 2022	San Diego Pride	Balboa Park	San Diego LGBT Pride
Luulyo 30, 2022	Leon L Williams Resource Fair	Downtown SD	San Diego County
Luulyo 30, 2022	2nd Annual Filipino-American Friendship Day	NTC Park	API Initiative Inc
Agoosto 1, 2022	Barona Pow Wow	Lakeside	Barona Band of Mission Indians
Agoosto 1, 2022	National Night Out	San Diego	SDPD
Agoosto 6, 2022	Dabaaldegga BAC	Chula Vista	BAC (Black Advisory Committee)
Agoosto 8, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Agoosto 13, 2022	Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha & Xog siinta - Kulankii dadka Waayeelka ah ee Fiyatnaamiiska	City Heights	Vietnamese Seniors
Agoosto 13, 2022	25th Annual Lemon Festival	Chula Vista	Third Avenue Village Association
Agoosto 18, 2022	Park After Dark - City Heights	City Heights	SD Park and Rec
Agoosto 20, 2022	Philippine Consular Outreach Mission to San Diego & Voter Registration Tabling	National City	Council of Philippine American Organization (COPAO) and Philippine Nurses Association in San Diego

Ballan qaadka Bulshada & Dhacdooyinka Oktoobar 20, 2021 - Disembar 2022

Agoosto 20, 2022	Park After Dark - City Heights	City Heights	SD Park & Rec
Agoosto 25, 2022	Park After Dark – Linda Vista	Linda Vista	SD Park and Rec
Agoosto 26, 2022	Vista High School Job Fair	Vista	Vista High School
Agoosto 27, 2022	Dib ugu noqoshada Dugsiga	Logan Heights	SAY SD
Agoosto 27, 2022	08 27 2022 Hindisaha API - Tababarka APIAVOTE - Taxanaha Tababarka NYMLI	San Diego	APIA Vote and API Initiative
Agoosto 27, 2022	Park After Dark – Linda Vista	Linda Vista	SD Park & Rec
Sebteembar 1, 2022	Sycuan Pow Wow	El Cajon	Sycuan Band of the Kumeyaay Nation
Sebteembar 1, 2022	Todobaadyada Diiwangelinta Codbixiyayaasha Dugsiga Sare	San Diego	San Diego County School Districts
Sebteembar 7, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Sebtembar 10, 2022	Dabaaldegga Bandhiga Bartamaha dayrta	San Diego	House of China
Sebtembar 10, 2022	Sanad guurada 50aad ee COPAO	San Diego	Council of Philippine American Organization (COPAO)
Sebtembar 12, 2022	Diwaangelinta Drive-Escondido Adult Village	Escondido	Pacific Housing Registration Drive
Sebtembar 14, 2022	Diwaangelinta Abaartada Drive-Palmilla	Escondido	Pacific Housing Registration Drive
Sebtembar 14, 2022	Translation Language Culture & Connection (TLCC) Work Group	Virtual	Translation Language Culture & Connection (TLCC) Work Group
Sebtembar 16, 2022	Maalinta Xornimada Mexico	San Diego	House of Mexico
Sebtembar 17, 2022	Oceanside Harbor Days	Oceanside	Oceanside Chamber of Commerce and Oceanside Harbor District
Sebtembar 18, 2022	Oceanside Harbor Days	Oceanside	Oceanside Chamber of Commerce and Oceanside Harbor District
Sebtembar 20, 2022	Maalinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Qaranka	Lemon Grove	San Diego County Lemon-Grove Branch
Sebtembar 20, 2022	Maalinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Qaranka	Spring Valley	San Diego County Library – Spring Valley Branch
Sebtembar 20, 2022	Maalinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Qaranka	Santee	San Diego County Santee Branch
Sebtembar 21, 2022	Fil-Am Vote Forum - The Filipino Vote	Chula Vista	COPAO and National Federation of Filipino American Association (NaFFAA)
Sebteembar 24 - 25, 2022	Adams Ave Street Fair	San Diego	Adams Ave Business Association
Sebtembar 24, 2022	Pacific Islander Festival Association Festival	Mission Bay	Pacific Islander Festival Association (PIFA)
Sebtembar 26, 2022	Diwaangelinta Abaartada Drive-Hacienda del Norte	Escondido	Pacific Housing Registration Drive

Ballan qaadka Bulshada & Dhacdooyinka Oktoobar 20, 2021 - Disembar 2022

Oktoobar 1, 2022	Balboa Park Pow Wow	San Diego	American Indian Health Center
Oktoobar 1, 2022	Taste of the Philippines	Balboa Park	House of the Philippines (HOP)
Oktoobar 2, 2022	Poway Fall Festival	Poway	Poway Chamber of Commerce
Oktoobar 4, 2022	Diwaangelinta Abaartada Drive-Sunrise Village	San Ysidro	Pacific Housing Registration Drive
Oktoobar 5, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Oktoobar 6, 2022	Diwaangelinta Abaartada Drive-Vista Lane	Chula Vista	Pacific Housing Registration Drive
Oktoobar 8, 2022	Double Ten ROC National Day Celebration	San Diego	San Diego Chinese Cultural Association
Oktoobar 8, 2022	Vive Tu Vida	San Diego	National Alliance for Hispanic Health
Oktoobar 15, 2022	SO SARAP SD - A Philippine American Food & Arts Festival	Downtown San Diego	Philippine American Society and Cultural Arts Troupe (PASACAT)
Oktoobar 19, 2022	Diwaangelinta Abaartada Drive-Rivera De Villa	San Diego	Pacific Housing Registration Drive
Oktoobar 19, 2022	Diwaangelinta Drive and Food Drive	San Diego	Black Panthers
Oktoobar 22, 2022	Diwaangelinta Drive-Bay View Baptist Church	San Diego	Omega Psi Phi Fraternity, Inc & Bayview Baptist Church
Oktoobar 23, 2022	Waxbarashada Cod-bixiyaha & Soo Bandhigidda Xogta - Nhu Lai Thien Tu Temple	San Diego	Nhu Lai Thien Tu
Oktoobar 23, 2022	Diwaangelinta Cod-bixiyayaasha Drive – Bayview Baptist Church	San Diego	Omega Psi Phi Fraternity, Inc & Bayview Baptist Church
Oktoobar 29, 2022`	25th Annual Día de los Muertos	City Heights	City Heights Business Association
Oktoobar 30, 2022	Waxbarashada Cod-bixiyaha & Soo Bandhigidda Xogta – Wesley Church	San Diego	Wesley Church
Oktoobar 30, 2022	Waxbarashada Cod-bixiyaha & Soo Bandhigidda Xogta – Phat Da Temple	San Diego	Phat Da Temple
Nofeembar 2, 2022	Bandhigga Caafimaadka iyo Kheyraadka Bulshada ee billaha ah - Arbacada 1aad kasta ee bisha	San Diego	Dr. Suzanne Afflalo, Kaiser Permanente, YMCA, Many Shades of Pink.
Nofeembar 12, 2022	Ride the Point	San Diego	Point Loma Rotary Club
Nofeembar 12, 2022	Kulanka dadka Waayeelka ah ee Fiyatnaamiiska	San Diego	Vietnamese Seniors
